# JASIIRADAHA J.F.S. EE GACANKA CADMEED

*Waxaa laga soo qaatay Kitaabka ADM. FAARAX A.C. EE TOPOGARAFIYADA XEEBAHA DALKA.*

Mandiqad Badeedka ee u dhaxeysa tuulada Lowye-Cadde iyo magalad Zeylac iyo weliba lagu sii daro biyah dhinaca Bari ee magalada waxaa ku yaala dhowr Jasiiro iyo dhowr melood oo Shacaabi (Coral Reef) ah waana kuwaan.

I. Jasiiradaha ama Jasiirado koxeed (Archipelago).

   Tiradoodu waa 6lix waxaase muqaal dhab ah leh 2 waxeyna kala yihiin:-


   1) Xaga Bari ahna Waqooyiga Zaylac, waxaa dhaca 2ba Jasiiradood oo ahmiyad gaar ah leh, waana: J. Sacduddiin iyo Jasiirada Ceybaad.

      a- **Sacaduddiin** (11° 25´ N, 43° 27´ E) waxay u jrtaa Zeylac 6 Miil waana tan ugu wada weyn Ceybaad (11° 30´ N, 43° 27´ E) 3Miil ayey Waqooyi kasii jirtaa tan hore.

Jasiirado koxeedkaan (badkooda oo biyaha u dhaxeya ay ku jiraan) lagu qiyasaa 300 $km^{2}$(1) = dhulka magalad muqadishu ay ku fadhido (20 km* 15 km).

Jasiiradahaan waxay ku kor yalaan Shacaabi dushood, waxey leyihiin dhir fara badan oo ay ku nool yihin duur joogta sida sagaarta, cowsha…IWM, waxaana aad uga buuxa biyaha ku

wareegsan kalluun, sidoo kale waxaa ku nool shinbiro-badeed lagu qiyaasay 100,000 (boqol kun) oo ah lamaane.




Jasiiradda Sacdudiin

2) **Jasiiradda Ceybaad** dhinaceedda Waqooyi waxaa ka taagan munaarad (Beacon) hagta maraakiibta badda ku gowsheysa, waxeyna ku dabeecad tahay tan sacaduddiin. J. Sacaduddiin waxaa dagan cirifkeeda Koofur oo soo xiga magaalada Zeylac kaluumeysato ka tirsan reer Zeylac.

Jasiiradahaan, Sacaduddiin iyo Ceybaad ahmiyad caalami ah ayey lee yihiin, waayoo noolaha laga helo iyo dabiicadda dhulka iyo dhirta ayaa noqdeen kuwo nadir ah, sidaas awgeed ayaa hey'adaha caalamiga ah ee daneeya deegaanka sida UNESCO iyo hey'ad gobaleedka Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed u aqoonsadeen Jasiirahaan meelaha la ilaaliyo lana xannaaneyo(2).

*Sawirka jasirada ka eeg bogga xiga (4)*




Jasiiradda Ceybaad

Magaalada Zeylac waxey leedahay tariikh dheer, waxaana Giriiggii Masar xukumayay seddexdii Qarni C.H. ku magacaabi jiray (Avalits), magacaan wuxuu socday waqtigii Romaanka laga bilaabo Qarnigii kowaad ee C.D. waxaa la rumeysan yahay in magaca Zeylac uu soo baxay casrigi islaamka Qarnigii 7aad ee Masiixiga.

Zeylac waxey aheyd magaalo ganacsi oo dekad leh iskuna xirta ganacsiga Geeska Africa, Buuraha xabashida iyo dunida inteeda kale, sidaas ayey aheyd ilaa waqtigii uu Booqday Ibnu Batuuta Qarnigii 14aad ee masiixiga.

Waxaa jagada kala wareegtay Berbera, gaar ahaan markii Ingiriiska uu qabsada dhamaadkii Qarnigii 19aad.

C. Badda ee X.D.S, wuxuu ku lahan jiray Zeylac Bar ilaalo Badeed (DIB) oo ku qalabeysan Radio. Radar, Qalabka hawada iyo koox Badmaxiin ah o oleh dooman.

**Jaziirad-kooxeedka (Archipelago) SUQADARA**


Jasiiradahaan kooxda waxey dhacaan Waqooyi-Bari (NE) ee Raas Caseyr, waxeyna kala yihiin:-

1. **JASIIRADDA SOQADARA** oo ugu weyn dhacdana dhinaca Waqooyi-Bari xuddunteedaana tahay =(12° 30° N, 53° 55 E)[3].

Jaziiradaani waxey leedaha qaab Ukun-leydii, labadeeda madax ay ku began yihiin Bari iyo Galbeed isuns jiraan 132 km (71 Miil), ballacuna yahay 50 km[(4–] (27 Miil).

Waxeyna ka dhan tahay kooxda 95%[(5)], bed ahaan, taa macnaheedu waxay tahay in bedkeedu yahay qiyas ahaan $3606km^2$; halka Jaziiradaha kale ay yihiin bed ahaan = 190 $km^2$ (wadarta bedka kooxdu = 3796 $km^2$[(6)]. (1113 Miil sq), oo ah kaliya dhulka Jaziiradaha.

Jaziiradda Suqadara waxey xigtaa waqooyiga kooxda Jaziiradaha, waxeyna ka fog tahay xeebta Yaman (oy hadda raacsan tahay) 220 N.M. (407 km)[(7)]; halka ay ka fog tahy Somaaliya 100 Miil kaliya, Jasiiradda Suqadara waa la daggan yahay hadda.




*Jasiiradda Suqadara*

2. **JASIIRADDA CABDALLA KUURI** waa Jasiirad yar oo xigta dhinaca Koofur ee kooxdaan, aadna ugu dhaw Somaaliya (Raas Caseyr) (50 N.M[(8)]) oo kaliya (93 km), waana la daggan yahay (Xuddun: 12°11´ N, 52° 15´ E)[(9)].



Jasiiradda Cabdalla Kuuri


3. Jasiiradaha kale ee iska yar waa kuwo loo yaqaano **Walaalaha,** waxeyna ka kooban yihiin laba Jasiiro oo yar yar **Samha iyo Darsa.**

   a) **JASIIRADDA SAMHA** (12° 08´ N, 53° 03´ E) waa jasiirad oo galbeed ka xigta walaasheed Darsa 14 miil, Xuddunta labaduna waxey ka fog tahy jasiirada C. Kuuri 35 Miil, Bari.

   Jasiiradan Samha dad yar ayaa dagan[(10)].

b) **JASIIRADDA DARSA** (12° 07´ N, 53° 17´ E) Bariga Xeebta Somaaliya, waxaana ku nool dooli badan.

Hase yeeshee, Jasiiraddan iyo labada kale oo aad u yar yar waxaa ku nool shimbiro-badeed fara badan(11).




Jasiiradaha walaalaha ah ee Samha iyo Darsa

Waxaa aad muhiim u ah in la xusuusto in jasiiradda kooxeedka suqadara ay ka fog yihiin xeebta Yaman 220 N.M halka ay u jiraan xeebta Somaaliya 50 N.M oo kaliya.

## MAAMULKA IYO DADKA

Jasiiradahaani waxey hoos tagaan waqtigaan dowlada Yaman; weliba gobalka Xadarmout, maamulka Jasiiradahan wuxuu ka kooban yahay 2 Degmo oo kale ah:-

1) Deg. Xadibuu oo dhacda Waqooyi bari ee J. Suqadara, waxaana dagan 32,000 oo qof.
2) Deg, Qalansiyaha oo koobta dhinaca Galbeed ee Suqadara iyo C.Kuuri waxaa deggan 18,000 qof oy ku jiraan 450 qof oo degta C.Kuuri iyo 100 qof oo dagan Samha.

Haddaba wadarta dadka dagan Jasiirado-kooxeedka (Archipelago) Suqadara waa 50,000 qof (2014)[(12)].

Dadka deggan Jasiiradahaan waxay kala yihiin:-

Maharo, Somaali, Hindi iyo Afrikaan[(13)], waxaa la og yahay in qabiilka Maharo uu deggan yahay dalka Somaaliya; waxey ii sheegeen odayaal ka mid ah Somaalida degta agagaarka Raas Caseyr in gabdhahoodu lagu soo arooso Jasiiradaas, arrintaan ay ab ka ab soo socotay sida ay ii shegeen.

Halkaan waxaa laga dareemi karaa in Somaaliya ay la laheed Jasiiradahaan xiriir ka qoto dheer kan Yaman oo ka fog 407 km dhul ahaan.

## DHAQAALAHA JASIIRADAHAAN

Dadka daeggan Jasiiradahaani waxay ku howlan yihiin: xoolo dhaqashada sida Geela, Lo'da iyo Ariga.

Tacabka beeraha gaar ahaan Timirta iyo Tubakada, sidoo kale dabashada Kalluunka.

Waxayna dhoofiyaan Timirta, Tubaakada, Subaga Lo'da, Kalluunka, iyo xoogaa dhirta iyo xabkaha laysku daaweeyo sida xabadu sowdaha iyo sibirka IWM(14). Waxaa jira airport dhaca Galbeedka magaalada Xadibu; sidoo kale deked ku taal Koonfur-Bari(15) ee J.Soqadara.

## TAARIIKHDA JASIIRADAHA SUQADARA

Jasiiradahaan taariikh ahaan waxey markasta gacanta u gali jirtay ciddii xoog leh: Giriiggii, Romaankii, Masaaridii hore, Turki, Burtuqeys oo ugu danbeyntii ka guuray Suqadara 1511 CD (Ciise Dabadiis), dabadeed waxaa sheganayay xukunkeeda Shuyuuq (Boqorro) ku nooleed xeebta J. Carbeed ilaa iyo 1834tii oo Ingiriisku qabsaday, ugu danbeytii Ingiriisku wuxuu ku wareejiyay Koonfurta Yaman 1967dii, dabadeedna waxey ka mid noqotay Yamanta midowday 1990kii(16).

Waxaana la leeyahay Jasiiradahaan waxaa laga helaa dhir iyo xayawaano aan meel kale laga heli karin, sidaas awgeed, waxey ku

tirisay UNESCO meelaha loo qoondeynayo in la ilaaliyo lana xanaaneeyo(17).

**ISXASUUSIN:**

Waxaa mudan in la xuso, lana hilmaamin in dowladdii Soomaaliya ay u gudbisay QM (UN) 30/6/2014tii in Jasiirado – kooxeedka SUQATARA ay ka mid tahay Biyaha Qaranka Soomaaliyeed.

**W/Q: ADM. GAAS. Faarax Axmed Cumar (F. Qare)**

## Maraajic:


1. Jasiirada Sacadudiin: Wikipedia
2. Jasiirada Sacadudiin iyo Ceybaad: Wikipedia
3. Socotra: Wikipedia 2014
4. Socotra: Wikipedia 2014
5. Socotra: Wikipedia 2014
6. Socotra: Wikipedia 2014
7. Socotra: Wikipedia 2014
8. Red Sea Gulf of Eden Pilot, Admiralty 1080
9. Red Sea Gulf of Eden Pilot, Admiralty 1080
10. Red Sea Gulf of Eden Pilot, Admiralty 1080
11. Red Sea Gulf of Eden Pilot, Admiralty 1080
12. Socotra: Wikipedia
13. Socotra: Wikipedia
14. Isaga
15. Isaga
16. Isaga
17. Isaga

# AMNIGA BADAHEENNA
# IYO
# C.BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA

**<u>Qeybta Amniga</u>**

Amniga badaheenna wuxuu qeyb muhiim ah ka yahay Amniga iyo Difaaca guud ee Qarankeenna.

Amniga badeed wuxu noqon karaa:

1. Amni Siyaasad
2. Amni Dhaqaale
3. Amni Deegaan (Bii'adeed)
4. Amni Bulsho
5. Amni Caskari (Milatari) …. (Burcad Badeed)

Amni heer kasta ha la haadee (Qof, Qoys, Degmo, Gobol, D.Goboleed iyo Qaran) waxaa lagu qeexaa: AMNI (xaalad Amni) waa inaadan dareemin cabsi, welwel iyo khatar kugu soo socota.

Amnigu wuxuu leeyahay laba waji:-

1. AMNI (waa inaad Nabad ku jirto ….)
2. Amnigeli (waa inaad keeni karto Nabad)

Labaduna waa labada waji ee lacagta birta macdanta ka sameysan, oo dhinac kasta waa isla lacagtii (Shilin, Dolar ..)

Dowladaha Dunida waxay xoogga saaraan tan Amnigelinta ah, si ay u hubiyaan Amnigooda.

Aan kalmad ka dhaho nooc kasta ee AMNI:

1. AMNIGA SIYAASADDU waa in Qarannku uu awoodi karo inuu soo saaro go'aan , ama ku dhaqaaq howl, ku saabsan danihiisa ku xaddidan gudaha Dalkiisa, haddii ay arrintu ay tahay Dan ama Dano ka baxsan xudduudda Qaranka, waa inuu Qaranku uu gaari karaa dahahaas asagoo raacaaya Qaanuunka Dowliga. Haddii dowladi ay awoodi weydo inay waxay doonto ka fuliso Dalkeeda, ama ay wax ku weyso Qaanuunka Dowliga, Qarankaasi wuxuu ku jiraa Amni darro. (Nabad la'aan).
2. AMNIGA DHAQAALE asaguna wuxuu leeyahay laba waji oo kala ah in goobaha dhaqaale ay Amaan yihiin iyo in la amnigelin karo, tusaale:-

   Badaheenna waxaa ku jira kheyraad badan oo kala ah noole iyo ma noole, hadaba aamin maka yihiin xadgudub (sida burcad Kalluunka oo iska gurta Kaluunkeenna ruqsad la'aan), taasi waa Amni la'aan dhinaca kale ma amnigelin karno kheyraadkeenna HADABA ARRINTU WAA AMAAN LA'AAN.

   Sidoo kale haddii Maraakiibta ka/ku socota Dekedaha ay kala kulanto AMAAN LA'AAN, ay sababaan Burcad – Badeed (AMNI MILATARI), waxna aadan ka qaban karin ayaduna WALLEE MA AHAN AMNIGELIN LA'AAN.

3. AMNIGA DEEGAAN – BADEEDKA (BII'ADA BADDA)

Amnigaan waa mid leh AHMIYADIISA gaarka ah, waayo waa mid aan aad ugu muuqan dadka intooda badan, wuxuuna koobaa:-

a) Burburinta Shacaabiga Badda (Coral Reef) oo ay sameeyaan Maraakiibta Burcad -Kalluunka.
b) Burburinta Darbiyada dabiiciga ah ee kala xira Badaha iyo Beriga oo ay baabi'in ku hayaan kuwa xeebta ka qoda dhagaxa; waxaana ugu daran magaalooyinka xeebta, gaar ahaan Caasimadda Muqdisho oo meelo badan biyihii Baddu ay soo galeen Berriga; waana arrin khatar keeni karta, haddii aan wax laga qaban, in magaalooyinka xeebuhu QARQAMAAN, gaar ahaan haddii Tsonami uu dhaco ama biyaha baddu ay kacaan ama bataan, waana arrimo aan hore wax uga qornay; bandhig guudna ay ka sameysay Hey'addeenna (H.C.B.S).
c) Haamanka Xeebaha ku soo daadanaya (ilaa hadda waa 24 HAAN), kana imaanaya badda ooh ore loogu aasay. Waxa ku jira 100% lama oga, waxaase la rumeysan yahay inay yihin SUN.
d) WASAKHDA MAGAALOOYINKA IYO BACAHA oo ku qulqulaya badda oo halis ah, dhowr jeerna Hey'addu baaris ku sameysay kana digtay.

Waa AMNIDARRO halis ah, laakin ilaa heer wax laga qaban karoo o la amnigelin karo, haddii loo soo jeesto.

4. AMNIGA BULSHADA: runtii intii aan ka soo warannay oo Amniyaal ah (Siyaasad, Dhaqaale, iyo Bii'ad) waa Amni Bulshadeed guud ahaan; laakin si gaar ah waxaan ula jeednaa Amniga Bulshada ee Badeed waa:-

   a) Caafimaadka Bulshada oo u isticmaasha badda xag raaxeysi, xag ka shaqeysi iyo xag isticmaal (cunid) Kalluunka badda.

      Waxaa Hey'addaani ogaatay in xeebaha Caasimaddu ay wasakheysan yihiin, meelo ka mid ahna aan lagu qubeysan karin (xeebta xaafadda aw aweyska ee Xamar weyne); ayna ka jirto khatar Libaax badeed; sidoo kale kalluunka laga cuno Caasimadda Xamar wuxuu ka yimaadaa Baddaan ay ku aasan yihiin Haamanka sunta lagu tiriyo, lamana soo marsiiyo baaris sheybaar, sidii jiri jirtay waqtigii Dowladdii Kacaanka.

      ARRIMAHAAN iyo kuwo la mid ah waxay leeyihiin dhibaatadooda AMNIDARRO, hase yeeshee waxbaa laga qaban karaa (Amnigelin) haddii loo joogsado.

5. AMNI MILATARY, waxaan ula jeednaa AMNIDARRO si toos ah uu u sameeyo ciidan ajnabi ah ama cid sidii ciidan u hubeysan (Burcad – Badeed).

   Amnidarrida noocaan ah, waxaa Amnigelin u heli kara Ciidan Waddani ah. Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa: Burburin saddex Manaaradood oo Ciidanka Kenya ay ku kaceen agagaarka khooriga WEYN ee BUURGAAWO bilo ka hor oo Hey'addaani baartay, warbixinna ka siisay Hey'adaha Dowladda oy khuseyso. Amnigelinta arrintaan ka aqriso qeybta Difaaca ee C.Badda.

**<u>Qeybta Difaaca:</u>**

Qeybtaani waxay ku saabsan tahay AMNGELIN BADEED, waxaana fulin kara (oo kaliya) Ciidan Badeed.

C.Badda Soomaaliyeed, markuu jiray, wax amni xumi ah ma jirin, haddana la'aantiis AMNIGELIN ama Amnisugid Badeed ma jiri karto. Sidaas waxaan u leeyahay waa ogaal hubaan ow u leeyahay, waayo, waxaan ku soo biiray 1966kii ayadoo ay joogaan 6(lix) Markab oo ahaa X.J (Xeeb ilaaliyeyaal); wuxuuna gaaray 1976dii 25 (shan iyo labaatan) Markab oo nooc kasta leh aadna looga heybeysto. Waxaan ka ahaa 1982-84 Taliye. Markii mar danbe (2009kii) la ii magacaabay inaan asaaso C.Badeed, wax muuqda, oo Tabarteennu gaari kartay ayaan ka qabannay oo Ciidan wanaagsan Ayaan asaasnay. Waxaase xusid mudan inaan ku

taliyey isla markii la ii magacaabay Asaasidooda iyo Hoggaanka Ciidankaan inaan Madaxda kula taliyey:- in loo abuuro ciidanka badda iyo kan Cirka oo wada ahaayeen meel eber ah wax ka bilaaw laba Dugsi Farsamo oo sii diyaariya farsamayaqaanno (matoor, koronto, wadidda Doomanka, isgaarsiinta, Raadarrada, hubka …iwm).

Waayoo labadaan Ciidan waa kuwo TEKNIKA aad u adeegsada. Ujeeddadu waa inaan sii diyaarsanno farsamayaqaanno. Si aan u hanan karno Maraakiib iyo Daraarado oo la soo iibsan karo. ARRINTAAN MA HIRGELIN; dad leh farsamooyin kala duduwan, gaar ahaan kuwa fudud, gudaha ayaa lagu diyaarin karaa.

<u>Dardargelinta Waxtarka Ciidanka Badda.</u>

Waxaa lagama maarmaan ah in Dowladda dhexe ay abuurto ugu yaraan 2 (laba) Urur, Dowladgoboleed kastana ay diyaariso min hal Horin – ilaa Hal Urur.

URURRADAAN waxaa loo tababaraa sidii Dillaaxin Badeed (DANABKA BADDA), waxaana lagu hubeynayaa Hubka Fudud (DANAB). Ciidankaan waxay u dagaalamayaan sida HADDA BURCAD -BADEEDKU ay u howlgasho oo ku qasabtay Dowladaha xoogga badan eel eh Maraakiibta khatarta ah oo leh nooc kasta iyo Dayaarado inay ka adkaan waayayaan Burcad – Badeedkii oo weli si xoog leh uga jirta ADDUUNKA. Ciidanka Badda Soomaaliyeed ma sugi (karo) sanooyin badan oo Maraakib

uu ku helo, ama uu ku weyn karo. Tan kale waxaan xusuusin lahaa Dowladda Dhexe iyo dowladaha xubinta ka ah in Ciidankaan ah Danabka Badda loogu isticmaali karo howl kasta oo amni sugid ah sidii ciidamada kale oo waa HAL DHAGAX KU DIL LABA SHIMBIR. Ugu dambeyntii waa inaan ogaanno in Baddu ay u tahay Qaranka Soomaaliyeed Nolol Dhab ah oo la isku halleyn karo, laakiin taasi waxay ku xiran tahay Ciidan Badeed oo la dhiso, waxtarna ah oo ilaashada BADDIISA.

Guul.

**ADM. GAAS. Faarax Axmed Cumar (F. Qare)**

# XAALADDA BADMARIDDA EE BADAHEENA

Soomaaliya waxay ku taallaa mandiqadda Geeska Afrika waxay xuduud badeed la leedahay dowladaha: D'Jabuti,Yemen & Kenya.

Bedka dhulkeedana waa 638,109 sq. Km. Waxay leedahay xeeb aad u dheer oo gaareysa 3,048 km. Dhumucda biyaha dalkuna waa 350 M.B, (648.2 KM) Bedkeeduna waa 2.5 jeer dhulkeena.

Haddaba, baddaas baaxadda intaas la eg leh boqolkiiba boqol kama hayno warar sugan marka laga reebo meelaha aan ka sammeynay survey-ga (Baarista) sanadahii 2017 – 2019ka, ee xeebaha u dhaxeeya Jazeera iyo Ceel Macaan 50 KM, oon ka qornay kana soo qaadnay sawirro waxyaabahii aanu ku soo aragnay muddadii aanu ku gudajirnay survey-ga, Dhibaatooyinka jira oo dhacay muddadii burburkii dowladda dhexe ee soomaaliyeed iyo dagaaladii ahliga ahaa ee isbiirsaday ma yara.

Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed uma helin awood dhaqaale iyo qalabba oo ay ku soo baarto dhibaatooyinka badmaridda ee ka jira badaha Soomaaliyeed, laakin waxay diiwaan gelisay meelo badan oo ay maraakiib ku caarisay & Haaman ay ku jireen haraadiga Sunta ee warshadaha reer iyo isbitaalladooda oo ay ku aaseen badaha Soomaaliyeed, xilligii burburka ee dowlad la'aanta.

Soomaaliya waxay leedahay dekedo fara badan oo isugu jira kuwo casri ah iyo kuwa macmal ah oo ay ku soo xirtaan Maraakiibta & Doomaha ka keena ganacsiga qaaradaha kala duwan ee dunida ayna wax kala soo degaan ganacsatada gudaha iyo kuwa dibadda. Tan ugu weyn waa dekedda Muqdishu waane ay u dhan yihiin adeegyadeeda caadiga ah oo kala duwan, sidoo kale waxaa heer sare ah Dekedaha Barbara,Boosaaso iyo Kismaayo.

Sida la wada ogsoon yahay dalka Soomaaliya wuxuu lahaa Muqdishu Light house oo ay soomaalida u taqaanay “Masawac”, kuna yiilay agagaaraha Madaxtooyada Soomaaliya, gaar ahaan dhakada sare ee taagga Raadiyo Muqdishu, kaasoo lahaa nal wareega oo Maraakiibta ku hagayey Dekedda Xamar wuuna hallaabay. Dekedaha kale, sida Berbera, Boosaaso iyo Kismaayo, waxay wada lahaayeen fannaaro iyo Adeegyo wanaagsan, wax way ka nool yihiin waxna way hallaabeen.

Haddaba, maraakiibta dooneysay si ay u soo galaan dekedaheena waxay bearing (jiho) ka qaadan jirtay isla light house-yada, wallow ay wateen charts tusinaayo halka ama marinka ay u soo marayaan kolka ay doonayaan inay ku soo xirtaan dekedaheena, inkastoo inta aanay soo gelin dekeddaha marka hore lagala hadli jiray barta hoggaaminta dekedda (port Control) si loogu sheego haddii ay toos u soo xiranayaan oo ay u bannaan tahay boos, (Berth) ay ku soo xirtaan ama waxaa la fari jiray inay dhigtaan baroosin (anchorage)

biyaha ka baxsan gudaha dekedda, si haddii uu bannaanaado boos, (Berth) ay ugu soo xirtaan looguna diro "Pilot" ku soo xiro booska uga bannaanaaday marsada gudaha dekedda.

Biyaha Badda ee u dhaxeeya Jasiira iyo Ceel Macaan waxaan ka helnay 14 (afar & Toban) BURBUR Maraakiib oo ku quusay biyaha Badda, taasoo khatar weyn ku ah badmaridda (Navigability); waxaa inoo muuqata, in xaaladda Badmaridda ee Xeebaha Dalka ay u baahan tahay Hubin, taasoo Dalbeysa awood Cilmiyeed, Mid dhaqaale iyo Mid farsamo oo ku immaan karta Mashruuc ballaaran oo Dowladdu fulineyso.

Dhinaca kale, haamanka (Conteenarrada) wasaqda sunta ah ay ku jirto oo ayaguna ka soo dhacaya Badda, haddana daadsan xeebaheena, oo Hey'adda Cilmi barista badahu ay ka diwaangelisay 24 Haamood, ayagu waxay Dhib ku yihiin Badmaridda Biyaha Xeebaha ku dhow oy adeegsadaan doomanka kala duwan.

Waxaa intaas la sii jira in Manaaradaha Xeebta (Becons & light houses) oo wax weyn ka tara Hagidda Maraakiibta mareysa badaheena oo tiro ahaan ahaayeen 34 (Soddon & afar) ku teedsan xeebaha Dalka, maanta ma shaqeeyaan oo waxay u baahan yihiin Dib u habeyn Buuxda oo isugu jirta Dhismo, qalabeyn iyo sugidda tilmaamaha caalamiga ee hore ay lahayeen.

F.G. Maraakiibta sanad kasta ku degta/caariso badaha dunida ma yara laakin waxaan soo qaadaneynaa – Markabkii ganacsiga ahaa eek u caariyay badweynta hindiya, sanadkaan dhexdiisa magaciisuna ahaa: MSV KRISHNA SUDAMA ee ka diwaan gashanaa dalka India.



Kadib markii ay ku xummaatay baddu kuna kaceen mowjadu aad u laxaad badangudaha khaliijka loo yaqaan (Golf of Kutch) ee magaalada Gujraat. Markabkii wuu degay markii ay qarqiyeen biyo aad u fara badan.

Ugu dambeyntii ciidamada gurmadka ee degganaa Gujraat waxay ka soo bad baadiyeen 12, ka mid ahaa shaqaalihii markabka oo kaliya.

Ustaad saciid, Geli aad heyso. Mahadsanid.a

Waxaa kale oo la xusi karaa Markab (Nanker) saliidda qaada, ayaa ku jabay sanadkaan agagaarka Jasiiradda Madagaskar oo shidaal fara badan ku sii daayay Badda. Taas oo halis ku ah Noolaha Badda.

Waxaa Xusid Mudan in Duufaan Xoog leh ay ku dhufatay Xeebaha Bari-Wogooye, 22/11/2020, waxayna geysatay khasaaro Naf iyo Mood, waa arrin u baahan in loo tabaabusheysto xag saadaalo iyo xag gurmad.

Calla kulli waa in lagu baraarugsanaadaa Dhibaatooyin soo noqnoqda.

**Diyaariye.**
Madaxa Waaxda Badmaridda
Capt. Maxamud Cali Raage (kabtan Kuruu). -=(KURUU)=-

# XAALADDA KALLUUMEYSIGA SHARCIDARADA EE BADAHEENA

***Diyaarie: Mustafe Hassan Nur***

Soomaaliya waxay leedahay xeeb aad u dheer oo kala ah Gacanka Cadan iyo Badweynta Hindiya, waxan ku jira kheyraad aad u badan oo kala duwan oo iskugu jira kheyraadka nool iyo kan an nooleyn. Haddaba mudadii dheereyd ee Somaaliya ku jirtay burburka iyo dagaalada sokeeye, kuna burbureen dhamaan kaabayaashii dhaqaalaha iyo dhamaan adeegyadii ay dowladnimadu wadatay, sidoo kale waxa meesha ka baxay  ilaalintii iyo kafaa'iideysigii kheyraadk badda.

Markii la waayey awoodii dowladdu u laheyd ilaalinta kheyraadkeeda, gaar ahaa kuwa biya badda, waxaa aad u kordhay xadida iyo xaalufinta baddeena oo ay si sharci darro ah uga kalluumeystaan dowlado shiisheeye, si an kala sooc laheyn ayey noolaha badda u gurtaan, waxayna dhib weyn u geystaan deegaanka noolaha badda, ayadoo waliba dhib u geysnaayey kalluumeysatada yaryar ee Somaalida, maadama ay ka qalab fiican yihiin, taasina waxay keentay iney hub qaataan kalluumeystadii yaryareyd ee Soomaalidu, iskuna badaleen burcad badeed. Kalluumaysiga sharci darrada ah, ayaa ah mid si weyn ugu baahsan biyaha Soomaaliya walow ay badda ku sugan yihiin ciidamo

caalami ah oo ka kala socda dalal kala gadisan, kuwaas oo ay shaqadoodu tahay inay ka hortagaan falal dambiyeedyada burcad badeednimada, laakiin burcad kalluunka wax shaqo ah kuma darsadaan.

Hadaba markii ay ree galbeedku bilaabeen iney la'dagaalamaan burcad badeedkii Soomalida, waxaaa dhinaca kale sii laba laabmay burcad kalluuunkii oo ka hoos shaqeynaaya maraakiibta la'dagaalanta burcad badeedka , sheegeyna iney u heysanin awoowd ay kula dagaalamaan kuwa baddeena xadaaye balse iyakuba qeyb ka yihiin. Dirasad ayey sameysay Hey'adda Secure Fisheries biya somaliya, waxay ku sheegtay in Maraakiibta gunta hoose ka jillaabta ay si baahsan uga kalluumaystaan baddeena, waxayna bartilmaameedsadaan moolka hoose ee biyaha oo ay ka xaalufiyaan kalluunka. Maraakiibta gunta hoose beegsata waxay dabar' goyn ku hayaan noocyo ka mid ah kalluunka, iyagoo deegaankana waxyeello weyn gaarsiinaaya, hoosna u dhiga kala duwanaanshaha Bey'adda, islamarkaana yareeya kalluunka biyaha ku jira. Waxaana lagu qiyaasayaa dhulka la xaalufiyo inuu ka badan 6000 mt oo kalluun ah sannad kasta, waxaanna laga yaaba in ay dhimashada kalluunku intaas ka sarreyso marka loo eego jillaabashada an masuuliyadi ku jirin. Intaas waxaa dheer in tirada maraakiibta ah ee gunta hoose ka jillaabata ay ka badan yihiin kuwa ay hey'ada sahmisay.

Daraasad ay sameysay Hey'adda FAO oo ku saabsaneyd Kalluumeysiga sharci darada ah (illegal, unreported and unregulated fishing), ayaa lagu sheegay in Maraakiib shiisheeye xaalufin ku wado biyaha baddeena, waxaana lagu qiyaasay iney sanadkii cecelis ahaan ka helaan kalluunka ay ka xadaan baddeena lacag kor u dhaafeysa afar boqol iyo koton milyan oo doolar (Illegal Fishing Costs Somalia 450 million per year).

Haddaba kheyraadka badda Somaaliya, waa mid aad u dayacan, oo ummada Somaaliyeed ayna ka faa'iiideysan, marka aad eegto dhaqaalaha dalka ka soo gala biyaha badda waa mid aad u yar, laguna qiyaaso inuu yahay boqolkiiba labo (2%) Dakhliga dalka ugu badnaan, ayadoo waliba heysano xeebta ugu dheer Qaarada Africa.

Waxaana lagu qiyaasay iney shaqo buuxa ka helaan 30,000 Kun oo kaliya guudahaan wadanka, halka shaqo dhiman ay ka haystaan 60,000 kun oo ruux, sida ay muujisey daraasad ay sameeysay (Secure fishiries) taariikhdu markay ahayd 2015. Hey'dda FAO waxay sheegtay isticmaalka kalluunka Soomaaliya inuu aad u hooseeyo, noqdeyna kuwa ugu hooseya Africa.

Dowladuna waa dadaaleysaa sidii ay ula joojin laheyd kalluumeysiga sharcidarada ee kasocda baddeena, Bishii Maarso, ee sanadkan 2020 ka, dowladda Soomaaliya ayaa waxa ay uga digtay dalalka Iiraan iyo Pakistan kalluumaysiga sharcidarrada ah

ee ay ku hayaan biyaha dalka. Dowladda ayaa waxa ay hore u xirtay tobannaan kalluumaysato oo u dhalatay dalka Iiraan oo la qabtay iyagoo ka kalluumaysanaya biyaha Soomaaliya.

Waxay soo jeedineysaa Hey'adda Cilmi Baarista Baduhu in kor loo qaado la dagaalanka kalluumeysiga sharcidarada ah, lana xoojiyo Ciidanka ilaalada badda, loona raadiyo qalab u fududeyn kara la socodka falalka danbiyada ka dhaca  biyaha baddeena, hadii ay ahaan laheyd burcad badeed iyo mid kalluunba. Waxaa kale oo loo baahan yahay in kor loo qaado wacyi gallinta bulshada isticmaalka kalluunka, si ay uga faa'iideystaan kheyraadka nool ee biyaha, laguna dhiiri galiyo ganacsatada iney sameeyaan Warshado kalluunka lagu farsameeyo iyo qalab fiican oo lagu kalluumeysto.

**Tixraac**

https://securefisheries.org/about
https://securefisheries.org/sites/default/files/SecuringSomaliFisheries-FullReport.pdf

# ISBADALKA CIMILADA

QORE: XASAN CUSMAAN XASAN

## HORDHAC

Isbadalka Cimilada waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu halista badan ee aduunka wajahaaya iminka ama ku soo fool leh, waxuu saameyn weyn ku leeyahay noolaha gaar ahaan xoolaha la dhaqdo & kalluunka, beeraha, hormarka dhaqaalaha, hiddaha & dhaqanka, cuntada & biyaha, amaanka iyo caafimaadka dadka.


## WAA MAXAY ISBADALKA CIMILADA?

Inta aanan qeexin waxa uu yahay Isbadalka Cimilada, waa inaan ogaano waxa ay kala yihiin Jawi (weather), Cimilo (climate), Nidaamka cimilada (climate systems) iyo kala duwananta cimilada (climate variability) ee dabiiciga ah, kadibna waxaa si wanaagsan u fahmi doonnaa waxa uu yahay Isbadalka-Cimilada (Climate change).

Jawi (weather) waa isbadalka hawada ee maalin laha ah. Jawigu waxuu tilmaamaa xaaladda markaas lagu jiro. Tusaale "maanta roob ayaa da'ay jawigu maanta waa qabow, shalayna qorax baa jirtay oo jawigu wuu kululaa". Cimilo (climate) waa celceliska (average) xogta jawiga mudo 30sano ku dhawaad ah. Tusaale waa sida celceliska heerka uu dhan yahay roobabka magaalada

Muqdisho. si guud jawiga waxuu isku badalaa si lama filaan ah, mudo yarna wuu isku badalaa, balse cimilada waa isbadal la sii filan karo ama la sii dheehan karo wayoo mudo dheer buu qaataa isbadalkeedu.

Nidaamka cimilada (climate systems) waa isbadalka joogtada ah ee ka dhasho isla falgalka nidaamyada koonka ee dabiiciga ah (sida nidaamka hawada, biyaha, barafka, ciidda iyo noolaha) dhexdooda ama saameyn dibadda kaga timaado sida qoraxda iwm. Isla falgalkaas waxuu sababaa kala duwananta cimilada (climate variability) ee dabiiciga ah. Tusaale isbadalka badaha (change in ocean) sida in heer kulka biyaha oo isbadalo, ama biyaha oo sara u kacaan (sea level change) waxaa sababay falgaladda nidaamyada biyaha iyo hawada. Sifcan waxaa ugu fahmi doonta sawirka soo socda:




## ISBADALKA CIMILADA (CLIMATE CHANGE):


Isbadalk Cimilada UNFCCC (United Nations Framework Convention on Climate Change) waxeey ku qeexday inuu yahay isbadal cimilada ku yimaado, kaasoo si dadban ama toos ah ay u sababaan falgalo dabiiici ah iyo ficilada dadka, kuwaasoo khalqal galinaaya isku-dheyla tirnaanta walxaha hawada koonka ku sugan.

## MAXAA SABABO ISBADALKA CIMILADA?

Ficilada ama falalka ay dadku sameeyaan ee sababo in khalqal ku yimaado isku-dheyla tirnaanta walxaha ku jira hawada aduunka ee loo yaqaano GHG (greenhouse gases) sida (Carbon dioxide, Methane, Nitrous oxide, chlorofluorocarbons etc). falalkaas sababa in (GHGs) uu bato, ka dibna keeno hawada aduunka iney wasakhowdo waxaa ka mid ah warshadaha, beerashada, isticmaalka gawaarida ama diyaaradaha iyo waxkastoo loo adeegsado gubidda shidaalk iwm. Falalkaas ama howlahas ay dadku si joogta ah u sameeyaan kuna xiran nolashooda ayaa hawada aduunka ku kordhiya walxaha aan kor ku soo xusnay ($CO_2$, $CH_4$, $N_2O$, CFCs iwm) walxahaan waxey awood u leeyihiin in ay dib ugu celiyaan dhulka hawada kuleel uu iska soo saaray, taasna waxey keentay in heer kulka dhulka uu sara u kaco (Global warming) ilaa darajada kuleelka ay korortay 4.3° Fahrenheit 50kii sano ee la soo dhaafay, lana filaayo iney gaarto 2100ka ilaa 11.5° F, sida IPCC (Intergovernmental Panel on Climate Change) ay sheegtay. Balse arinta walwalka abuurtay ayaa ah, naqaskan

(gases) ku dahaaran dhulka, waxuu ku nagaadaa hawada aduunka mudo aad u badan oo gareysa ilaa boqolaal sanadood.




**MUHIMADDA DIRAASEYNTA ISBADALKA CIMILADA**

Isbadalka Cimilada waxuu si toos ah u saameeyaa nolasha dadka, qaar kamid ah cilmi baarayaasha waxee Isbadalka Cimilada ku tilmaameyn inuu yahay bilaawga aduunya gadoonka, arintaasna ma aha mala-awaal, maxaa yeelay heer kulka dhulka waxuu sara u kacay ilaa 4.3° Fahrenheit wax ka yar 50sano, sida aan horay ugu soo sheegnay. Arintaan waxey sababtay in si degdeg ah u milmo barafka cirifyada aduunka yaallo (Ice milting), waana arinta keentay in heerka biyaha badaha ay sara u kacaan (sea level rise) ilaa in ka badan 8inches, qarnigii la soo dhaafay waxaa isbadalay da'idda roobka, asagoo marna yaraado sababana abaaro (droughts), marna aad u kordho sababa daadad xoogleh (floods).

Waxaa adkaaday in la sii qayaaso cimilada aduunka, waxaana aad u batay arimaha lama filaanka ah (sida mowjadaha kuleelka oo lama filaanka ah, qabow xaddhaaf ah, duufaano lama filaan ah iyo daadad iyo abaaro isdaba socda). Dhamaan arimahaas waxeey si toos ah ama si dadban ay u dhibaateeyaan, beeraha ama dhamaan geedaha, xayawaanka (ay ku jiraan xoolaha dadku dhaqdaan), kalluunka iyo dhamaan nadaamka nolasha ee dabiiciga ah, sidoo kale waxee saameeyaan biyaha iyo caafimaadka bani'aadmka.

## MAXEE YIHIIN IPCC & UNFCC?

IPCC (Intergovernmental Panel on Climate Change) waa madasha heerka dowladeed ee Isbadalka-Cimilada. 1988kii kadib markii arimaha Isbadalka cimilada iyo siyaasadda is dhax galeen, Hey'adaha qaramada midoobay ee UNEP (United Nation Environment Program) iyo WMO (World Meteorology Organisation) waxee si wadajir ah u abuureen IPCC si ay arimahaas diiradda u saarto. Howlaha IPCC waa sadax arimood oo kala ah:

- Waxee dib u eegis ku sameynayaan dhamaan maqaalada iyo warbixinada cilmiga ah ee laga qoray Isbadalka Cimilada.
- Waxee soo saaraan shantii sanno mar, warbixino kooban oo cilmiyeysan oo quseeyso Isbadalka Cimilada.


- Warbixintaas oo cilmi ahaan iyo farsamo ahaanba heer sare ah, siyaasad ahaanna dhexdhaxaad ah.

UNFCCC (United Nation Convention on Climate Change) waa hashiis caalami ah waana sharci ay qaramada ku mideysan yihiin, si loogu xakameeyo, laguna maamulo waxa loo yaqaano GHG (Greenhouse Gases). Hashiiskaan waxaa la galay 1992kii, waxuuna dhaqan galay 1994kii, waxaana saxiixay ku dhawaad 200 oo dowladood.

(UNFCCC) sanad walba waxee qabtaan shir lagu magacaabo COP (Conference of Parts) COP1 waxuu ahaa shirkii 1aad, waxuu ka dhacay Berlin, Germany 1995kii, waxaana ugu danbeeyay COP 25 oo lagu qabtay Madrid, Spain 2019kii. Shirkaan sanadlaha ah ay UNFCCC qabato kuwa ugu caansan waxaa ka mid ah COP 3 (Kyotopratacol), COP 15 (Copenhagen) iyo COP 21 (Paris Agreement).

Shirka COP waxuu diiradda saaraa laba qeybood:


- Wadamo waajibkooda yahay inee sameeyaan qiyaaso, la qabsi iyo ka hortaga saameeynta Isbadalka Cimiladda
- Wadam waajibkooda yahay inee bixiyaan dhaqaalo lacageed, si wadamada soo koraayo ay kaga hortagaan Isbadalka Cimilada.




## XALKA ISBADALKA CIMILADA

Heer-kulka dhulka ee sii kordhaayo ma’aha arin uu hal qof ama hal dowlad ay wax ka badali karaan, balse waa arin u baahan in aduun weynaha oo idil ay si wadajir ah ugula tacaalaan. Si guud IPCC la dagaalanka Isbadalka Cimilada waxeey u kala qaaday laba qeyb oo kala ah: In la dhimo sababaha keena Isbadalka Cimilada (Mitigation) iyo la tacaalidda dhibaatada ka dhalatay Isbadalka Cimilada (Adaptation).






Maadaama Isbadalka Cimilada uu kuyimid hab-nolaleedka bani'aadamka, waxaa lagu qasban yahay in la badalo hab nolaleedkii hore anagoo raaceyno tilaabooyinka soo socda:

- In la joojiyo gubidda dhuxusha, shidaalk iyo gaaska dabiiciga. Isla markaana la isticmaalo waxii suurta gal ah in lagu badalo sida awooda dabeesha iwm.
- In la yareeyo isticmaalidda gawaaridda gaarka loo leeyahay, la isticmaalo gawaarida dadweynaha (public bus) ama (baaskiil).
- In la joojiyo isticmaalidda gaari ka weyn 10sanno.
- In la yareeyo magaaleynta (urbanization) iyo jaridda keynta.
- In la yareeyo cunidda hilibka, isla markaana la badiyo cunidda waxyaabaha aan gubidda badan u baahneeyn sida khudaart.

- In dhalmada la yareeyo.



# Saamaynta uu ku leeyahay Isbadalka Cimilada Noolaha Badda

**W/D: Anas Cali Madar**

## Hordhac:

Cimillada waxaa lagu qeexaa xaalad jawiyeed socota muddo dheer, halka Isbadalka cimilada lagu qeexo isbedel ku yimaada cimillada, taas oo saamayn toos ah iyo mid dadban  ku yeelan karta howsha biniaadamka. Is badalkan cimilada waxaa uu ka yimadaa uumiga karboonada ay siidayaan warsahdaha (industrial carbon emissions) Kuna sii daayaan hawada dhulka, waxaana ka dhasha Diirimaadka dunnida( Globol warming), in uu kordho misne sare u kac ku yimaada heererka badda, cusbadda oo biyaha badda ku badata, habka nafaqadda noolaha oo is badala, iyo wareega biyaha badda oo is badal ku yimaada. Casrigaan warshadaha wax soo saarka dunida ayaa ka dhigaya dinidu in ay ku loolanto dhanka wax soo saarka warsadaha taas oo ka dhalanaysa in lagu sii daayo hawada uumi farabadan oo kaarboono ah, waxayna keenaysaa in uu isbadal ku yimaado habka nolaleed ee noolaha guud ahaan, gaar haan habka silsiladda cunnada ee noolaha badda. Sidaas oo kale waaxaa is bedelaaya deegaanka oo noolaha uu ku nooolyahay. Is bedelka cimilladu waxuu ka koobanyahay; kulka ama diirimaadka (Temperature or worming), cadaadiska hawada (Atmospheric pressure), dabeylaha (Winds), Qoyaan (humidity) IWM.

## Saameeynta is bedelka cimilada ee noolaha badda

### Diirimaadka Badda (Ocean warming)

Inta lagu gudajiray qarnigii tagay, daraasada la sameeyey ayaa sheegay in ceceliska heerkulka dhulka iyo oogada sare ee badda ay kordheen, waxaana keenay sare u kaca ku yimid wasakheynta hawada, taas oo ay masuul ka yihiin bani aadamka. Nooloha badda inta badan waxaa lagu tiriyaa in uu heerkulkoodu yahay mid sugan oo anan jeclayn isbadbadalka ku yimaada heerkulka marka loo bar bardhigo kuwa ku nool barriga, sidaa daraadeed, Diirimaadka badda oo kor u kaco waxaa ay keenaysaa in uu nooluhu ka hayaamo deegaan nolaleedkiisa uuna raadsado meelo heerkulkisa la jaan qaadi karo. Qaar ka mida bahooyinka qatarta ku jira waxaa laga yaabaa in ay u safraan meelaha kulkoodu qabowyahay, oo laga waayo deegankii laga heli jiray, sidaas oo kale heerkulka sare waxa uu dhib u gaystaa cunnadii uu ku noola kalluunka, waxayna cillad ku keeni kartaa silsiladda cunnada ee kalluunka. Habada sidaan xogta ku helnay, waxay sheegaysaa in dalkeenna uu samayn taban ku yeeshay heerkulka dunnida ka jira, waliba waddamada ugu nugul in aan ku jirno marka loo eego waddamada horumaray ee dhaqaalaha badan u haysta sida ay deegaan koodu u ilaalin lahayeen uguna hortagi lahaayeen wax yaabaha ka dhasha isbedelka cimilada. Xog aan ka soo uruurinay kalluumaysatada gobolka baanaadir ayaa sheegaysa in kalluunada qaar tankii la soo

qaban jiray sanadihii hore iyo hada uu farqi wayn u dhaxeeyo, mararka qaarna la waayo nuucyo ka mid ah kalluunka, taas oo ka dhigaysa in uu saamayn taban ku yeeshay isbadalka cimilada, waxaa kale oo keeni kara kalluun yarida, xaalufinta dhirta deegaan badeedka ay ku hayaan burcad kalluunka, sidaas oo kale waxaa sababa waskhaynta badda, haraadiga kiimikada, iyo saliidda ama oolyada oo ku daadata biyaha badda “oil spills”.

**Wax soo saarka assaasiga ah (Primary productivity)**

Isbadalka heerkulka waxa uu saamaynayaa meelaha ay ku badantahay wax soo saarka, waxaana ka mid ah dhirta “plankton” uu ku noolyahay kalluunka taas oo ah isha ugu muhimsan ee cunnada ay ka helaan noolaha badda, sida nibiriga (**whales**) oo kale. Bahooyinka oo ka safra ama ka guura deegaan kooda waaxaa sababa deegaan kooda oo ay ku arkaan heerkul sare oo baabi’iya dhirtaas dababadeedna ay isaga huleelaan oo ay raadsadaan deegaan ku haboon heerkulka jirkooda iyo cunnadooda. Deegaan badeedka dalkeena inta badan waxaa lagu arkay in dhirtii ay ka sii dhamaanayso taas oo ay ka dhalatay kadib markii la arkay, xaalufin maraakiibta shisheeye ee burcad kalluunka ah, ku waas oo wata shabaagado ay ku jiidaan cows badeedkii , taas oo ay u sii dheertahay isbadalka cimilada iyo wasakhaynta badda.

**Aasidhaynta biyaha badda (Ocean acidification)**

qiyaastii rubuc ka mida karboonka ($CO_2$), Waxaa nuuga biyaha badda maalin waliba, sidaa darteed uumiga hawada lagu siidaayo waxay dhib ku keenaysaa ama hoos u dhigaysaa pH biyaha badda taas oo ka dhigaysa in aasidhka ku bato biyaha waxanya samayn taban ku yeelanaysaa noolaha badda, sidaa daraadeed sare u kaca ku yimaada aasidhka biyaha waxay dhib ku tahay qaar ka mid ah noolaha sida **(corals, mussels, oysters)** In ay samaystaan hab dhiskooda qolfoofeed ee sare. Habada in aasidhka ku bato biyaha waxay keenaysaa is badal in uu ku yimaado korintaanka, horumarka, badnaashaha iyo sii jiritaanka guud ahaan nooloha badda.

**Talo Soo jeedin**

1- Waa in dalkeena ka qeyb noqdaa heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan yareynta uumiga hawada lagu sii daayo.
2- In laga hortago burcad kalluunka oo dhib wayn ku haaya deegaanka ama cows badeedka, kuwaas oo burburiya hoygii ama cunnadii kalluunka.
3- Joojinta wasakhaynta badda nuucyadeeda kala duwan, sida ku shubista bacaha “plastics”, qashinka, dhiiga kawaannada ka yimaada iyo xal u helida haamanka haraadiga kiimikada ee soo caariyay.

4- Ilaalinta, beeridda iyo hagaajinta cows badeedka iyo coral reefs ka (rehabliation of see grasses and coral reefs) iyo ku beerida mangroofska xeebaha dalka.
5- Iyo joojinta xaalufka geedaha barriga iyo badaha, taas oo keeni karta samayn togan in ay ku keenan degaanka, waxaana ka dhalanaya in karboonka ay yareeyan madaama ay geeduhu u bahanyihiin.

**Gunaanad**

Isbadalka cimilada waxa uu saamayn wayn ku hayaa dunida guud ahaan gaar ahaan dalkeena, Waxaana nalagu tiriyaa wadamada ugu nugul qatartana ugu jira saamayntiisa oo aan aragnay waxyaabaha ka dhashy sida daadadka, abaaraha, roob yarida, hadaba maqaalkan waxaan ku iftiiminay samaynta uu ku yeeshay isbadalka cimilada noolaha badeena, oo aan ku ogaanay in uu saamayn balaaran ku sameeyay heerkulka biyaha habka silsliladda cunnada ee noloha badda, sidaas oo kale pH ka in uu ku yaraado biyaha waxuu keenaa aasidhka oo biyaha ku bato, sidaas oo kale waskhaynta guud ee badda in ay ka qeyb qaadato nabaad guurka deegaanka noolaha uu gabbaadka kaga dhigto noloshiisa, ugu danbayna uu ka haajiro degaankaas markuu ka waayo heerkul ku haboon noloshiisa iyo cows badeed ku filan.

# NOLOSHA NOOLAHA BIYAHA SARE EE BADDA (OPEN OCEON) IYO SAAMEYNTA ISBADELKA CIMALADU KU LEEAYAHY

**Qore: Mustafe Hassan Nuur**

**Hordhac**

Biyaha baddu waa qeyb ka mid ah biyaha dhulka, loona yaqaano (hydrosphere), Biyaha baddu waa kuwa ugu badan dhulka korkiisa, ayna ka yihiin in ka badan boqolkiiba 70%, waxayna Biyaha Baddu ka sii yihiin boqolkiiba sagaashan iyo dodoba (97%) biyaha macaan oo noqonaya boqolkiiba saddex (3%), dhulkana waxay ku fadhiyaan qiyaas ahaan 140 milyan oo meyl labo jibaar. Dabeecada biyaha baddu waa dhanaan oo waxaa ku badan maadooyinka sameeya cusbada, ka dhigaaya biyaha badda kuwo an lacabi karin laakiin, waaxaa ka buuxa nool noole fara badan oo iskugu jira dhir iyo xayawaanba.

Deegaanka badda waxaa loo qeybshaa labo (2) qaybood oo kala ah; biyaha kore iyo kuwa hoose ee Sagxadda dhulka. Biyaha kore (pelagic environment) waa lakabka sare ee biyaha badda, hoyna u ah noolaha ugu badan ee badda, gaar ahaan kuwa cuntadooda sameysta, waana deegaan ay gaari karto falaaraha iftiinka qoraxdu oo muhiiim u ah xagga cunta sameysiga, taasi oo dhirtu cuntadeeda ku sameysto (photothyntheisis), ka dibna noolaha kale een cunto sameysan ay ku sii dul nool yihiin, waxaana loo

yaqaanaa wax soo saaraha 1aad (primary producer) ee silsiladda cuntada. Tamarata qoraxda ka timaadaa waxay si fiican u gaartaa lakabka ugu sareeya biyaha oo ah ilaa 200m hoos.  Noolahan ku jira lakabka sare ee degaan badeedka, waa kuwo uu yaryahay socodkoodu, waana kuwo intooda badan sabbeeya (floating) Biyaha dhexdooda, sidaasna waxay inta badan uga badbaadaan noolaha kale ee ugaarsanaaya ee ku nool biyaha hoose ee badda.

Hadaba waxaan kaga hadleynaa maqaalkan nolosha ka jirta biyaha sare ee badda ee noolaha ugu badani ku noolyihiin; dhir iyo xayawaanba.

**Biyaha kore (Open Ocean)**

Waa biyaha badda ee qeyta sare, waana biyaha ugu badan badda, waxaana la sheegaa iney yihiin 1,370,000,000 cubic kilometers (334,000,000 cubic miles)


Biyaha kore waxaa ku badan dhaqaaqa hirka iyo wareega biyaha, si fududna waxaa saameyn ugu leh isbadalka cimilada, sidaa awgeed waa kuwo degdeg isku bedbedala, saameyn weyna ku leh noolaha deggan biyaha kore (Open Ocean). Deegaankani wuxuu hoy u yahay noolaha badda kuwa ugu badan sida planktonic oo iskugu jira dhir loo yaqaano phytoplankton iyo kuwo xayawaan ah, waana Zooplankton ooy ka mid yihiin (jellyfish, small crustaceans, pelagic snails etc), mana awoodaan badankoodu iney dabaashaan, waxaana wada qulqulka biyaha badda iyo hirarka isku dhacaaya.

Nooca labaad ee deegaankan ku nool waxaa ka mid ah ku dabaasha ku fiican oo socsocda ama guurguura sida; Naasleyda , kalluunka iyo waliba xawaanka waayen ee Qolofleyda (crustacean). Noolaha deegaankan ku nooli waxay kula qabsadeen deegaankan iney ka helaan cuntadooda, kana dhuuntaan kuwa ugaarsanayaan (avoiding predators), waxaana ee cawineya waa iney dhaqdhaqaqi karaan ama ha dabaasheen ama hirarku ha qaadee ma jiro wa adag oo qabsan kara ama ka hor istaagi kara socodka.

Biyaha furan ama sare ee badda waxaa loo sii qeybshaa ilaa afar heer, ayado loo fiirinaayo joogga hoose, waxayna kala yihiin;

1. **Epipelagic** oo ah lakabka u sareeya ee biyaha badda, kana bilowda ziiro ilaa labo boqol oo mitir oo hoose(0-200m**)**. Deegaankani waa ka noolaha ugu badani ku noolyihiin, gaar ahaan kuwa cuntadooda sameysta sida dhirta iyo algaha oo waliba aad u yaryar sabeeyna biyaha sare, waana meel falaaraha qoraxdu si fiican u gaarto, kana caawisa dhirta iney diyaarsato cuntadeeda, waxaa kale oo ku nool kuwo kale oo iyaka sii cuna.
2. **Mesopelagic** waa qeybta labaad ee biyaha, waxyna ka bilaabantaa 200 ilaa 1000 mitir, deegankan waxaa sii daciifaya (yaraanaya) tamarta iyo iftiinka qoraxda, wayna ku yar tahay, sidaa awgeed, dhirtu qeybtan kuma noola,waxaasa ku nool xayawaan waxayna lakabkan ka helaan Iftiin ay wax ku arki karaan.

3. **Bathypelagic** waa qeybta sadexaad ee Open ocean ama biyaha kore, qeybtani waxay ka bilaabantaa kun ilaa afar kun oo mitir jooga hoose ah (1000 -4000), deegaankani waa mid ka qabow kuwii hore, biyuhuna way cufnaan badan yihiin, waayo kuleylkaa ku yar. Iftiinka qoraxda wax yar baa gaara, gaara ahaan, siiba ka blue lightka oo ah kan ugu fog.
4. **Abyssopelagic**, kani waa lakabka ugu hooseeya ee biyaha sare ee badda, waxuuna xigaa biyaha sagxadda hoose, waana kuwa ugu qabow una dhaw iney baraf noqdaan, waxayna fidsan yihiin afar kun ilaa lix kun oo mitir (4000 to 6000m), qeybtan wax iftiina ma leh, qoraxduna ma gaarto. Noolaha deegaankan ku nool, waxay u badan yihiin, kuwa an laheyn laf dhabar, intooda badan iyaga ayaa iftiin soo daaya ay wax ku arkaan, kuna ugaarsadaan, waxay ku noolyihiin ee ugu badan waa noolaha kor ku nool markii uu dhinto ee u hoos u dago ayey quutaan (eating detritus as food), waxa kaliye ee cunto sameysan kara waa nuucyo ka mid ah Bacteria oo isticmaasha chemical energy, kuna diyaarsata cuntadeeda, xayawaan kalana ay sii quutaan ayada sida; tube worms.




Waa Sawir muujinayaa qeybaha uu ka kooban yahay deegaanka biyaha kore

**Nolosha noolaha Biyaha sare**

Noolaha deegaankan ku nool waxaa loo qeybshaa ilaa saddex qeybood oo kala ah;

- ✓ phytoplankton, oo ah dhira yaryar ee ishu arag, waana geedaha ugu badan aduunka, waxayna asaas u yihiin nolosha noolaha kale, maadama ay iyagu cuntadooda sameystaan, ahna meesha ay Silsilada iscunista ka bilaabato, xayawaanada kalana ay sii cunaan si toosa iyo si dadbanba. Geedaha deegaankan ku nool waxay helaan maadooyinka u suurto galinaaya iney cuntada sameystaan sida; Corbondioxide, sunlight ku filan iyo nafaqo badan oo

biyuhu kor soo mariyaan, lakabka sare ee biyahu, waxuu si fiican u helaan iftiinka qoraxda ee geeduhu cuntada ku sameystaan, markasta oo hoos loo siisocdana waxa sii yaraada awooda iftiinka iyo nafaqada ay u baahna yihiin .

- ✓ qeybta labaad waa xayawaanka yaryar ee an awoodin dabaasha raacraacana socodka hirarka badda, waxaana loo yaqaana Zooplankton, kuwani waxay ku badan yihiin biyaha sare oo ay noloshooda ka helaan.
- ✓ Qeybta sadexaad waa noolaha dabaasha ku fiican ee kolna qeybta hoose taga, marna kor, waxaana ka mid ah; Naasleyda iyo Kalluunka.

## IFTIINKA QORAXDA

Iftiinku waa mid ka yimaada cadceeda kaasi oo ku dhaca qaybta sare ee biyaha badda kaasi oo u sii gudba qaybta hoose, waxuna leeyahay cabir lagu cabiro oo u gaar ah, sida caadiga ah iftiinka cadceeda markii uu ku dhaco qaybta sare ee badda waxaa ka sii gudbo falaaro iftiin ah kuwaasi oo ay u baahan yihiin noolaha badda siiba dhir badeedka, waxaa jiro qaybo uu kala qaybsamo taasi oo muujinaysa heerka iftiinka ay gaari karto iyo waxqabadkiisa, iftiinka cadceeda ee gaaraya badda waxaa loo qaybiyaa illa laba qaybood wax afka qalaad lagu yiraahdo photic iyo dysphotic

a. Photic: Waa iftiin gaaraya illa 200 mitir ee hoos badda kaasi oo dhir badadeedka ka saacida in ay sameeysato cuntadeeda, sidoo kale ka hesha midabeyta dhirta.
b. Dispohitic: Waa qaybta labaad ee iftiinka cadceeda , qaybtaan waa mid gaarayaa laga bilaabo 200 ilaa 600m oo gudaha badda, waxayna kaliya ka caawisaa noolaha badda sida xayawaanka in ay wax arkaan kuna socdaan balse waa mid aanan waxba u tarayn dhir badeedka maadama aysan iftiinkeeda ku samaysan karin cunto.

**DABAYLAHA IYO DEEGAAN BADEEDKA**

Dabeeylahu waa kuwa dhaqaajiya biyaha badda, waxayna qaabeeyaan mawjadaha iyo hirarka rac oo rac kala ah; kuwo culus iyo kuwa fudud. Dabayl badeedku waxay faa'iido u yihiin deegaankan iney nafaqadii hoos jirtay kor keenaan, noolaha an dabaalana waxay u sahalan socsocodka, sidoo kale dabayl badeedku waxeey waxtar u leeyhiin deegaanka badda, kuwaasi oo u sahala in ay isku dheeli tirnaato, ayadoo samaynaysa baddu isrogogga biyaha, si ay nafaqadu kor u soo marto, waayo nafaqadu inta badan waxay jirtaa hoosta badda, noolaha badankiisuna sida dhirta waxay ku noolyihiin biyaha qeybta sare si ay u helaan iftiinka qoraxda, dabeyshu waxa kale oo ay ka qeybqaadataa iney biayah isrogrogooda ay Oxsagiinka iyo Carboonka hawada ku jira iney badu keento oo sidaana noolihii u baahna ku helo.

## Saameynta u ku leeyahay isbedalka cimiladu noolaha lakabka sare ee badda

Noolaha ku nool qeybta sare ee badda ee loo yaqaano pelagic species, waxaa saameyn weyn ku leh isbadelka cimilada sii kululaanaya, waxaana soo gaaraya tamar baban oo qoraxda ka imaneysa, taasoo kor u qaadey heerkulka biyaha badda, ayna halisku tahay noolaha an u dul qaadan Karin isbadelka ku yimid deegaan badeedka oo ay sobabtay diirimaadka aduunka (global warming), gaar ahaan, badaha ku yaala dhul ku leylaaha waxaa laga cabsi qabaa kalluunka iyo noolaha kale ee u nugul isbedalka iney haaf ka mid ah la waayi doono qarnigan dhamaadkisa, kuwa socodka iyo dabaasha ku fiicana ay u kici doonaan cirifyada badda, dhinaca kale xayawaankii ku noola biyaha qabow iyo barafka waxay la kulamayaan dhib aad u weyn, waxaana meesha ka baxaya barafkii oo dhalaalaya biyuhna waa sii kordhayaan heer ku koodu.

Waxaa biyaha badda sare ku badan uumi baxa, waxayna keeneysaa taasi iney cusbadu sii badato oo nooluhu u adkeysan kari waayo, waxayna saameyn ku leedahay sii yaraanshaha Coral reefs, oo noolaha badankooda hoy u ah, maadama ay isbashay heerkii PHka biyaha.

## Xigasho

https://www.britannica.com/science/pelagic-zone

Baumgartner MF, Tarrant AM. 2017. The physiology and ecology of dipause in marine copepods. Annu. Rev. Mar. Sci. 9:387–411.

https://sciencing.com/animals-abyssal-ecosystem-19407.html

Longhurst, A. (2007). Ecological geography of the sea. Elsevier, Amsterdam

# Raadka Isbedelka Cimilada ee Biyaha Oogada Sare ee Dalka
# Effect of Climate Change on Somali Hydrology

**W/Q: Abdulrahman Mohamud Dirie**

## Hordhac

Soomaaliya waa dal dhaca geeska Afrika, dhulbarahuna uu ka maro qaybta koofureed kaas oo diirimaad u keena dalka, taas oo uu wadankaynu kala mid yahay wadama badan oo dhaca Afrika, koofurta America iyo Aasiya (Beltrando & Camberlin, 1993). Soomaaliya, cimillo ahaan waa dal cimillo kulul, saxara ah misne qallalan badankii marka laga reebo qayb yar oo koofurta dalka ah mooyee, abaaraha iyo daadadkuna ay kusoo badanayeen sanadahii dambe. Eray bixinta cimillada waxaa loo qaybiyaa laba nuuc oo kala ah cimillo gaaban "Weather" oo muddo kooban ku dhaca, ugu badnaan bilal iyo cimillo dheer "Climate" kaas oo muda dheer socdo sida sanado badan. Soomaaliya waxaa maro seddax wabi oo kala ah; Shabeelle, Jubba iyo Daawo. Maqaalkan waxaan kaga hadli doonaa raadka ama saameynta uu is bedelka cimilada ku leeyahay wabiyada iyo roobabka Soomaaliya "Somali hydrology".

**Sababaha keena is bedelka cimillada**

1. Nabaad guur iyo geed jaris "Deforestation or Degradation"; dhirta oo la jaro iyadoo dhuxul loo isticmaalayo waxay ka qayb qaadanaysa is bedelka cimillada oo aad u xumaada. Dhirtu waxay nuugtaa Carbon Dioxide-ka ($CO_2$) hawada ku jiro, sidaasi darted markii dhirta la jaro waxay sababi kartaa in uu curiyahaas ku bato hawada misne sababa is bedel cimillo oo xun. $CO_2$ waxuu ka mid yahay gaasas badan oo hawada dhib ku hayo oo lagu magacaabo "Greenhouse gases" (Chalvatzaki & Lazaridis, 2010). Midkaan si aad ah Ayaan uga qayb qaadannaa, Soomaaliduna way xaalufisaa dhirta oo dhuxul ahaan aye u isticmaashaa, iyada ayaana sabab wayn ka qaadata in qaybo ka mid ah dalka uu roobka ku yaraado, heer kulkana uu kordho.
2. Warshadaha wawayn ee kala duwan; warshadahaan kala duwan waxay hawada kusii daynayaan wasaqayn fara badan iyo gases kala duwan oo ka qayb qaadanayo in ay Greenhouse gases-ku ay hawada ku bataan, waxaa ka mid ah warshadayntaas kala duwan: kuwa ka shaqeeya arrimaha shidaalka iyo gaska oo sababa in Carbon Dioxide "$CO_2$" iyo Nitrous Oxide "$N_2O$" ay hawada ku bataan, kuwa ka shaqeeya xoolaha oo sababa inay jawiga ku badiyaan Methane "$CH_4$" iyo kuwa soo saara sunta ama daawada beeraha lagu bacramiyo oo ka qayb qaata badashada $N_2O$ ee

jawiga. Inta badan arinkaan Soomaaliya kama qayb qaadato oo caalamka horumaray ayaa sababa laakiin wadankayna saamayntiisa ayaa ku dhacdo.


3. Maamul xumi, wacyi galinta oo yar amaba jirin iyo xogta is bedelka cimilada oo nagu yar; Soomaali ahaan midaan dhib wayn aye nagu haysaa wayna ka qayb qaadataa deegaanka iyo cimilada oo sii xumaado.

**Raadka/Saameynta isbedelka cimilada ee wabiyada dalka**

(Magadza, 2000) waxuu sheegay in cimiladu ay aad u saameeyeen wabiyada Soomaaliya gaar ahaan sanadahii dambe, mar walbo oo ay dunida warshada ku bataan cimiladuna xumaadaan waa mar walbo oo ay saamayso wadamada nugul misne ah kuwa soo korayo oo dalkaynu qaybta ka yahay. Saamynta uu isbedelka cimilada u gaystay Soomaaliya waxaa ka mid ah:

1. Daadad/Fatahaado: is bedelka cimilada waxay sababeen roobab xad dhaaf ah misne si kadis ah ku da’a iyaga oo aan la filaysanayn sababababana fatahaad, roobabka ku da’a dhulka sare “Upstream” ee buuralyda Itoobiya misne sababa daadad xowli ah ee ku dhufta dhulka hoose ee Soomaaliya “Downstream”. Dhowrkii sana ee u dambeeyey waxay daadadka magaalada Baladwayne ku dhufteen laba ilaa seddax jeer celcelis ahaan; taas oo ah wax aan wali horay u dhacin misne u baahan in laga feejignaado.



Daadadka B.Wayne.

Is berberdhig daadadka 2018 &2020 ee wabiyada dalka

2. Abaaro: wadankayna heerkulka ayaa batay, uumigiina sidoo kale, taas oo dhalisay in biyahayna ama daruurtaynii naga guurto misne ay ku da'do ama ku hoorto dhulal kale, anagana dhulkaynii qalalo iyo abaara baahsan nagu habsadaan.



Wabiga oo guray

3. Hoos u dhac ku yimaada Tayada biyaha: is bedelka cimiladu waxuu sababeen inay hoos u dhacdo tayadii biyahaynii, midaa oo sababtay diikhow ama wasakhow biyo “Water Pollution”, midaan oo ku timid kadib markii dabaylo xoogan ay qashin fara badan usoo jiideen wabiyadii kadibne hoos u dhigtay tayadii biyaha wabiyadaas.



Hoos u dhaca Tayada biyaha dalka

4. Cudurro: is bedelka cimillada waxay sababaan cudurro, daadad xoogaan oo ka dhashta is bedelka cimilada ayaa sababa in ay isku darsamaan biyahii wabiga iyo kuwii suuliyada "Sewage systems" kadibne sababa cudurro "Water borne diseases" kadib markay bulshadu cabtay kuna qubaysatay.
5. Noole biyoodka: heer kulka oo kordhay, daadadkii oo batay iyo wabiyadii oo qarka kasoo jabay waxay saameeyeen nolosha noolayaal fara badan oo wabiyadayna ku noolaa gaar ahaan taranka iyo daganaashaha noolayaashaas, waxaa ka mid ah noolayaashaas takhada "Salmon fish" oo aad ugu yaraaday wabiyadayna.

**Raadka/Saameynta isbedelka cimilada ee roobabka dalka**

1. Roob yari: heer kul sareeya, uumi bax fara badan iyo dabaylaha oo naga jiiday caadkii wadankayna misne ku da'iyo wadan kale; waxay sababtay roob yari nagu habsatay iyo abaar baahsan oo ay adagtahay sida loogasoo kabto, tusaale ahaan abaartii 2011 ku habsatay gobollada Baay iyo Bakool midaas oo ilaa iyo hada barakacayaasheedi ku suganyahiin xerooyinka magaalada Muqdisho, meeshana ka saartay ama yaraysay wax soo saarkii deegaanadaas iyo dhibaatooyin kale oo fara badan.
2. Roob badni: midaani oo sabata fatahaad xad dhaaf ah oo ka dhalata roobab fara badan oo ka da'a Itoobiya, fatahaaduhu

waxay ku xiranyihiin xadiga roobka, mudada uu da'ayey roobka, dharagsanaanta dhulka ee biyaha iyo qaab dhismeedka dhulka uu ku da'ay roobkaas.

**Xal/Talo soo jeedin**

1. Geeda jarista oo la mamnuuco; midaan oo ka qayb qaadato hoos u dhigista $CO_2$ ee jawigaan ku jirta.
2. Warshadaha oo la yareeyo ama wadamada iyo shakhsiyaadka iska leh oo si dhab ah loola xisaabtamo – midaan dunida oo idil ayuu waajib ka saaranyahay, dhibta ay warshadahaas sababaan waxuu ku dhacayaa wadamada soo koraya "Developing countries", faa'idadana waxaa iska leh wadamada horumaray "Developed countries".
3. Qashinka wabiga lagu qubo oo la mamnuuco iyo wabiga oo la carra bixiyo; si looga baaqsado daadad xoogaan iyo qasaarahooda marka heerka wabigu sara u kaco.
4. Waci galin, xog wadaagid iyo digniin bixin joogta ah "Awareness, Data sharing and Early warning system".
5. Dayactir dhuleed: sida in qarka wabiga si wacan loo dhiso, in biya xireenno waawayn la diyaariyo; taas oo ka qayb qaadan doonta in biyaha ay celiyaan ama xataa haday soo fakadaan dhibkoodu yasirnaan doono.

## Tixraac


Beltrando, G., & Camberlin, P. (1993). nterannual variability of rainfall in the Eastern Horn of Africa and indicators of atmospheric circulation. *International Journal of Climatology*, *13*(5), 533-546.

Chalvatzaki, E., & Lazaridis, M. (2010). Estimation of greenhouse gas emissions from landfills: application to the Akrotiri landfill site (Chania, Greece). *Global NEST Journal*, *12*(1), 108-116.

Magadza, C. H. (2000). Climate change impacts and human settlements in Africa: prospects for adaptation. *Environmental Monitoring and Assessment*, *61*(1), 193-205.

## GABAY KA HADLAYA BADDA IYO KHAYRAAD KEEDA

Gabaygaan waxaa tiriyay Abwaan Shiikh Cabdiqaadir Salaad Faarax horaantii 1996. Waxa uu abwaanku gabaygaan xoogga ku saarayaa nimcada badda taala sida Kalluunka, Liibaxa, Aargoosatada IWM.  Gabaygaan wuxuu kamidyahay gabayada farakutiriska ah ee laga tirshay Badda.

Waxa uu abwaanku usharaxayaa gabar joogta meel howd ah oo aan waxba ka aqoon badda iyo waxa ku jira toona. Wuxuuna midmid ugu sharaxayaa qeybaha Kalluunka ku nool badda moolkeeda, qiimaha ay ku fadhiyaan, iyo sida loogu baxsado xilliyada ay abaaruhu dhacaan.

Waxa kaluu abwaanku ku faanayaa xirfadda uu uleeyahay dabashada Kalluunka, dabaasha iyo qaabka martida loogu sooro. Wuxuuna ugu dambayn usharaxaya qeybo kamida Malayga iyo magacyadooda.

**Wuxuuna yiri:**

Gabadhyahay macnaha guurku, waa kaa madowyahaye

In aad maqashoo mooye adi, kuuma soo marine

Intaa howdka meeraysay baa, maanku kaa dhumaye

Iska soo mushaax waxaan ku gayn, meel Malay badane

Badda maaxigeedaa nimcadu, maash isaga-taale

Malyuun lacagaa laga helaa, maalin gelinkeede
Maraakiibta aad maqashay baa, laga milaalaaye
Mashruucyada waxaa looga furay, waa maslaxad weyne
Macnahaas adoo nagu yaqaan, Mahado noo kaalay.
Mindida iyo Lacaafta iyo haddaan, Maqaddadii qaato
Mug haddaan dadabo, oo Idaad meel iskala taago
Diiraha maraya, hadduu milicsadoo eego
Waxaan soo marqaadaba, hadduu midigta iitiirsho
Haddii aan ku soo mudo Qariib, madaxu weynaaday
Mudka iyo Batuurka iyo haddii miilka laga gooyo
Muufada haddii loo shido, milifka loo taago
Goortuu macaansamo, haddii madaxda loogeeyo
Ruuxii magowshaaba, waa mahadnaqayaaye
Macnahaas adoo nagu yaqaan, Mahado noo kaalay.
Haddaan Shabaqa maamuuskaleh, iyo haddaan Maaskaraha qaato
Magaarida aroortii, haddaan mowjad kala shaalo
Miyaan dhexe haddii aan tagoo, dhowr mitir quuso
Waxaan soo mugleeyaba, haddaan miriq ka soosiiyo

Miisaan haddaan ulatagoo, magaca laynaadsho
Malyuumaad haddii lay qoroo, aan Kaarsadii mariyo
Macaluul Illaahay nooga raa, milayga Jiilaale
Macnahaas adoo nagu yaqaan mahado noo kaalay.
Abaar magacleh, Jiilaal hadduu, dunida maasheeyo
Xoolaha magoolkiyo, hadduu miidda ka idleeyo
Magaalada haddii uu galoo, muudsi laga waayo
Nin Bad maaxa waa lagu hirtaa, meeluu joogaba
Isagaa Mash-bacay aan fakhrigu meel ka soo galine
Macnahaas adoo nagu yaqaan, Mahado noo kaalay.
Waa mahad Illaahay nimcadda, moolka hurudaaye
Magacooda lama koobi karo, waana lay marage
Haddaanse miro ka faaleeyo, waa kula macaanaane
Maankaaga waa galayaa, muxubigaygii
Adigoo maqsuudaa ka imaan, howdkii Meersane
Inta mowdku kaa maqanyahaa, magac ku noolaane
Macnahaas adoo nagu yaqaan, Mahado noo kaalay.
Maafoosta iyo Qoofarka iyo, Miiganow damiska

Shiriirdka miisaankaleh, oo muruqo weynaaday

Maxaabiishta Nabaraanka gala, miida laga shiilo

Daalacaad maraysa iyo Burcayd, tuurta wada muujay

Murdeef cunaya, Caydiga mirtoo, meel uwada jeeda

Miishaarta xeebaha madha, iyo malaga Qoofoodka

Miyaarso iyo Sumiir madow, Maakishkiyo Suuca

Lugcad midableh, Maas iyo Sabyaan, maqasha Daynwoonta

Saraacimada, Seef muunada, iyo micigu weynaaday

Musaawi Kaambiyo, Matays milixu loogaato

Afka-Toobka goomaha mariyo, mabacyo daaqeenka

Mulligala, Aseebiyo, Qardabo, godadka meeraysa

Silqo mudan, Gocooraha mudkaleh, Maylaliyo Goondhe

Xabley miigsan, Aaray madow, Sheewo maraqeeda

Makoraanka Liibaanyadiyo, Rowlo miranaaya

Magac dheere Seeseemaniyo, Carabi Miirmaysa

Suwir muru-ruglaysa sidii, Miig ugololaysa

Yuubada Gantaal lagu matalo, mararka ay boodo

Maasha Alle kheyrku waa, kun iyo mowjuude

Hadbase kaad adigu maagtaad, malabsanaysaaye

Makhmas iyo Illaahay kaagareey, murugo howleede

Macnahaas adoo nagu yaqaan, Mahado noo kaalay.

*W/D: Abduwahid Abdullahi*

# UNCLOS

## DARAASAD KU SAABSAN QAANUUNKA BADDA (LAW OF SEAS) OO AH DUSTUURKA QAWAANIINTA DOWLADAHA OO SOOMAALI AY KA MID TAHAY (Q.305)

**W/D: ADM. Faarax Axmed Cumar**

### QEYBTA KOWAAD:

UNCLOS waa Qaanuunka ay ka shidaal qaataan dhammaan Qawaaniinta furuucda kale ee xariirka la leh BADAHA, sidaas awgeed waxaad iska dhihi kartaa waa DASTUURKA BADAHA. Tan kale waxaa u hogaansan Dowlada Dunida oo dhan (Qod.305).

UNCLOS wuxuu ka hadlayaa BIYAHA BADAHA, wuxuuna ka dhigay:

1. Biyaha gudaha (Internal Water)
2. Biyaha Dalka (Qaranka): (Territorial Water)
3. Biyaha xiga (Contiguous Water)
4. Biyaha Arkhabiilka (Archipelagic Water)
5. EEZ (Especial Economic Zone)
6. Biyaha Dagaandeg Qaarreenka (Continental shelf)
7. Biyaha Caalamiga (International Water)

Biyahaan dhammaantood waa kuwa ku fadhiya dhul (Mandiqad = zone).

Sido kale Unclos wuxuu xeerinayaa ARRIMO kale oo xiriir la leh Biyahaan (zoonooyinkaan) an soo xusnay, waxaana rejeyneynaa in aan mid mid isu kor taagno inshaa'Allah.

## XARRIIQIINTA ASAASIGA AH (BASE LINE)

Biyaha (Soonooyinka) BADAHA oon soo xusnay waa masaaxaad BALLAARAN, kolba sida ay u kala weyn yihiin; mar haddii laga hadlayo MASAAXAD (Dhirir iyo Balac) waxaa lagama maarmaan ah in la xaddido marka hore meesha Qiyaaska laga billaabayo amaba asal u ah xaddididda fogaamaha, meeshaas waxaa loo yaqaan xarriiqinta asaasiga ah.

Haddii xeebtu (ama qeyb ka mid ah) ay toosan tahay, xarriiqinta asaasigu waa halka ay gaaraan biyaha BADDU marka ay caariso (Q.5: UNCLOS).

Haddii xeebtu ay qalqalloocan tahay ama qeyb ka mid ah, xarriiqmaha asaasiga waa kuwa isku xira BARO HABBOON, sida Madaxyada badda (Q.7).

## AFKA WEBIGA

Afka webigu waa halka uu ka galo badda, xarriiqinta asaasiguna waxay noqoneysaa mid toosan ee isku xirta labada gaaw ee webiga oo ah halka caariga baddu gaaro, (Q.9).

## KHALIIJ

Khaliij (BAY) waa xeebta oo qaanso noqota, kana dhalato goob biyo ah oo ka soo baxsan badda caadiga ah; halkaan waxaan uga hadleynaa khaliij HAL dowladood ay leedahay, waxaana lagama maarmaan ah in NUS goobta (half circle) uu sameynayo dhexroorka isku jira labada dacal ee khaliijka, halka baddu ay carigeedo tago (ERIDDA KHALIIJKA). XARRIIQINTA asaasigu waa dhexroorkaas (Q.10).

## DEKEDAHA

Xadka asaasiga ee dekeddu wuxuu ka maraa xagga BADDA goobta looga baahan yahay in lagu fuliyo Howsha Dekedda. (Q.11).

## MAMNUUCID

Waxaa reebban in nidaamka xarriqmaha asaasiga ee Dowladeed ay ka xiraan Dowlad kale BADDA SARE ama EEZ keeda. (Q.7)

Waxaa u bannaan Dowladda xeebta inay ku xaddiddo xariiqmaha Asaaska ayadoo raaceyso qaababka ku cad Qodobbada la soo xusay (Q.14).

Hadda waxaan u gudbeynaa manaadiqdii (Soonayaashii) badda, waxayna u kale horreyn doonaan sida ay ugu kala dhow yihiin xeebta.

## I. **BIYAHA GUDAHA**

Waa biyaha badda ee ka xiga xagga Berriga xarriiqinta ASAASKA ah, waxaana lagu dabbaqayaa MABDA'A MARITAANKA madhan (innocent passage) (Q.8).

**DEKEDAHA**

1. Dekedda iyo meelaha looga baahan yahay shaqo fulinteeda (HALKA MARAAKIIBTU ay ku sugto KALTANKA deked gelidda), amaba wax laga raro ama wax laga soo rogo waxaa lagu tirinayaa Biyaha gudaha.(Q.14)
2. Haddii afka khaliijku uu ka yar yahay ama la eg yahay 24 Miil Badeed, waxaa lagu xisaabayaa Biyaha gudaha. (Q.10,F.4)
3. Afafka webiyada iyo laashashka oo xarriinta asaasku (Gacanku=V) uu la eg yahay ama ka gaaban yahay 24 Miil Badeed, Biyaha Berriga ka xiga xarriiqinta Asaaska waa Biyaha Gudaha.
4. Biyaha guduhu waxay la mid yihiin dhulka berriga oo waxaa lagu dhaqaayaa isla qawaaniinta Dalka.

## II: BIYAHA DALKA

1. Biyaha DALKU waxay ka billowdaan xarriiqinta asaasiga, waxayna u gaarayaan xagga badda (si toos ah) masaafo aan ka badneyn 12 Miil Badeed (M.B) = Nautical Miles, waa ballaca Biyaha Dalka (Q.3).
2. Awoodda Dowladdu waxay ku fidsan tahay Biyaha Dalka, Hawada ka sarreysa iyo Dhulka ka hooseeya (Q.2,F.2)
3. Waxaa lagama maarmaan ah in Dowlad kasta ay ku muujiso xuduudda biyaheeda Dalka MAP ama dhibcaha Co'ordinaadka (Coordinate points). Waana in lagu waargaliyo Xog guud ee Q.M. MAP kaas ama dhibcahaas xadaynaya biyaha dalka si uu xafido una gaarsiiyo Dowladaha dunida. Q.16

## MARITAANKA MADHAN (INNOCENT PASSAGE)

4. Maraakiibta Dowladaha oo dhan, ha ahaato mid xeeb leh iyo mid kalaba waxay xaq ay wada leeyihiin in ay ku gudbaan Biyaha Dal kasta Qaabka maritaanka MADHAN (Q.17)
5. Macnaha maritaanka madhan waa kan aan wax u dhimeyn Nebadgalyada Dowladda xeebta leh iyo nidaamkeeda. Maritaankaan waxuu u hoggaansan yahay heshiishkaan iyo Qaanuunka Caalamiga. Q.19 ( f.1)
6. Dowladda xeebta leh waxay awooddaa inay soo saarto Qawaaniin iyo nidaamyo lagu maamulaayo maritaanka

madhan ayadoo la ilaalinaayo heshiiskaan iyo Qawaaniinta Caalamiga ah Q.21.

Dowlada xeebta leh waxay xaq u leedahay inay qaaddo tallaabada lagama maarmaanka u ah inay ku hubiso biyaheeda Dal Danaheeda Qaran, iskana ilaaliso maritaan MARDABO. Q. 25.

**Maraakiibta sidda alaab (Badeeco)**

7. Maraakiibta ku socota ama sidda Quwada Atoomikada Khatar ah marka ay mareyso biyaha Dalka ayadoo ah mid MADHAN waa inay wadato Dokominti muujinaya waxa ay siddo, waana inay ilaaliso nidaamka u degsan maraakiibtaas sida ku cad Heshiishkan. Q.23
8. Wax lacag ah lagama qaadi karo maraakiibta mareysa biyaha Dalka, haddaan loo fidin adeeg (Q.26)

**Awoodda Ciqaabeed ee Dowlada xeebta leh**

9. Ma haboona in laga qaado tallaabo ciqaabeed Markab maraayo Biyaha Dalka, haddii aysan dhicin arrimo ay ka mid yihiin:-
   a. Haddii ay soo gaarto xeebta natiijadii danbiga
   b. Hadii danbigu yahay mid wax u dhimaya Nabadda iyo Nidaamka Biyaha Dalka

t. Haddii Kabtanku codsado ama wakiil Diplomacy ama wakiil Qusul Dowladda CALANKA ( Dowladda Markabku uu ka diiwaangashan yahay ) gacansiinta Dowladda xeebta ( F.1 ee Q.27 ).

Arrintaan ma saameyneyso xaqa Dowladda xeebtu ay u leydahay inay qaado talaabo waafaqsan shuruucdeeda, sida joojin ama hubin Markab ajnabiya dushiis oo maraya Biyaha Dalka, ka dib markuu ka tagay biyaha gudaha (dekadda) F.2 ee Q. 27.

**Awooda Madaniga**

10. Kuma haboona dowladda xeebta inay joojiso Markab ajnabi ah oo maraya Biyaheeda, ama ay ka duwdo halka uu ku socday ayadoo ay ujeeddadu tahay mooyee in lagu fuliyo Dacwad Madani ah oo ku saabsan ruux saran Markabka. (F.1aad ee Q.28aad)
11. Uma bannaana Dowladda xeebta inaay ku fuliso Markabka Dacwad Madani ah,Mooyee wixii xiriir la leh arrimo Markabka laga rabo (sida: Dayn iyo mas'uuliyad la rabay in la ilaaliyo marka la marayo Biyaheeda…iwm) F2aad ee Q.28aad
12. Dowladda xeebta waxay awood u leedahay marka ay fulinayso qawaaniinteeda inay Markabka ku qaado Dacwad

Madani ah, kaas oo maraya Biyaheeda ama taagan ama ay xirto marka uu ka baxo biyaha gudaha. (F3aad ee Q.28aad)

13. Haddii Markab dagaal uu fulin waayo Qawaaniinta iyo Nidaamka Dowladda xeebta ee loo dajiyey maridda Biyaheeda iskana dhegatiro markabkaasi wax kasta oo loo soo jeedsho si loo ilaaliyo nidaamka, waxaa u bannaan Dowladda Xeebta inay markabkaas ka dalbato inuu uga baxo si deg deg ah Biyaheeda Dalka. (Q.30aad)
14. Dowladda leh calanka markabku sito waxay dhabarka u dhiganaysaa wixii dhib ah ama khasaaro oo ka timaada Amar diidadii markabkaan, Markii uu maraayey Biyaha Dalka arrintaas oo ka soo horjeedda heshiiskaan iyo Qaanuunka Caalamiga. Q.31

## <u>III: Biyaha Xiga (Contiguous Zone)</u>

1) Dowladda Xeebtu waxay leedahay biyo ku dherersan biyaha dalka loona yaqaan Biyaha Xiga, waxayna awood u leedahay Dowladda Xeebtu inay isha ku hayso (Biyaha Xiga) ayadoo:

a) Lagu ilaalinayo inaan wax loo dhimin Qawaaniinta iyo Nidaamyada Canshuuraha, Caafimaadka, Safarrada dalkeeda iyo kan biyaheeda dalka.

b) In laga ogaado jebin kasta ee Qawaaniinta iyo Nidaamyada hore loo soo tilmaamay ee ka dhaca biyaha dalka.

2) Biyaha xiga ma ka badnaan karaan 24 Mill Badeed oo laga soo tirinayo xariiqda aasaasiga ah. (F.1,2 ee Q. 23aad)

**<u>CIRIIRIYADA BADDA (STREATS)</u>**

1. Nidaamka maritaanka MADHAN waa mid lagu dabaqaayo ciriiriyada oo dhan, gaar ahaan kuwa Caalamiga (SIDA BAB-AL MANDAB, NORMUZ, MALAKA..IWM). Q.34 iyo Qodobbada kale ee ku saabsan Arrintan.
2. Dowladda ama Dowladaha deriska la ah ciriiriga waxay awood u leeyihiin inay soo saaraan xeerar lagu Nidaaminayo maritaanka ciriiriga, waana wajib in la ilaaliyo xeerarkaas, Q.Q41-45.

**IV: <u>DOWLADAHA ARKHABIILIGA</u>**

1. Waa Dowladaha Deggan HAL Arkhabiil ama ka badan ama Jasiirado kale (sida INDONISIA, SYCHELIS, FILIPPINS …IWM) Q.46

2. Xarriqmaha asaaska waa kuwa isku xira madaxyada Jasiiradaha fog fog Q.47. Biyaha ku xiran xarriiqmaha asaaska ah waa biyaha gudaha; biyaha ka shisheeya Xar.Asaaska waa Biyaha Dalka, Biyaha Xiga, kuwa EEZ iyo kuwa Daggaandegga BADDA sida ay isugu xigaan (Cont.shelf) Q.48.

## V: <u>MANDIQADDA DHAQAALAHA EE GAARKA AH (EEZ)</u>

1. EEZ waa biyaha saaran Biyaha Dalka, Ballaceeduna wuxuu gaari karaa (mana dhaafi karo) ilaa 200M. Badeed oo laga soo tiriyo xarriijinta asaasiga ah xuquuqda iyo awoodda Dowladda xeebtu iyo Dowladaha kale waxaa caddeynaya juskaan 5aad, (Q.Q55,57).
2. Dowladda xeebtu waxay ku leedahay mandiqadda EEZ:-
    a) Xuquuq QARAMEED, sida baarintaanka iyo ka faa'ideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee nool iyo kuwa aan nooleyn ee Biyaha ka korreya, sagxadda BADDA iyo Dhulka ka sii hooseeya. Dhowrista kheyraadkaan iyo maamulkooda…iwm, sida dhowrista Deegan-badeedka, cilmibaarista Q.56.
3. Dowladda xeebtu waxay xaddideysaa inta (quantity) kalluun ee laga soo saari karo EEZkeeda; waana in la isticmaalo waddooyinka ugu habboon ee ka faa'ideysiga kheyraadka

badda, lana mamnuuco wax soo saarka xaddhaafka ah , lana dhaqan geliyo habka ka faa'ideysiga joogtada ah (sustainability) …iwm. Dowladda xeebtu waxay u kaashan kartaa ARRINTA la soo xusay Dowlada kale ama hey'adaha caalamiga ah. Q.61.

4. Dowladda xeebtu waxay bixin kartaa shatiyo kalluunmeysi ee la siiyo dowlada kale; kuwaan la siiyey shatiyada waxaa waajib ku ah inay ilaaliyaan HESHIISKAAS iyo shuruudaha ku qoran. Q.62.
5. Waxaa waajib ah in la ilaaliyo NAASLEYDA BADDA.Q.63 (sida Nibiriga, Dolfinka IWM).
6. Dowladaha aan xeebta laheyn waxay Xaq u leeyihiin inay ka qeybgalaan, si caddaalad ah, ka faa'ideysiga (Dheeraadka) kheyraadka EEZka. ee Dowladah xeebaha, ayadoo arrintaan loo marayo heshiis (ilaalinaya danaha labada dhinac) Q.69
7. Laguma dabbaqi karo Q.69 Dowladda xeebta ee dhaqaalaheeda xooggiisu ku tiirsan yahay kheyraadka EEZkeeda. Q.71

8. Dowladda xeebtu waxay awood u leedahay si ay u ilaashato xuquuqdeeda ee EEZka inay fatashto, qabato, heyso kuna qaaddo DACWAAD maraakiibta, waana inay sii dayso si deg deg ah maraakiibtaas haddii ay u hesho KAFAALAD iyo Damiin. Q.73
9. Xuduudda EEZ ee laba Dowladood ee isgarab yaal ama iska soo horjeeda waxaa lagu dhameynayaa HESHIIS ku fadhiya Qaanuunka Caalamiga ah iyo si nabad ah Q.74.

15. Waxaa waajib ah in lagu caddeeyo xudduudda EEZka Map ama Coordinate, lana gaarsiiyo xog.guud ee Q.M. Q.75.

# <u>Dufcadii Koowaad ee ka Qalinjebisay AKADEMIYADA CULUUMTA BADDA ee Khaliif Macow Xasan</u>

Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed (H.C.B.S) oo la asaasay 2013tii, waxaa xilkeeda ka mid ah Baarista ARRIMAHA Badaha Dalka iyo Baahinta aqoon-badeedka, oo lagu qiyaasay in ka yar 1% (HAL Boqolkii) waxbarashada Dalka.

Sidaas awgeed ayaa H.C.B.S. ay u asaastay 2015 Akadeemiyada lagu barto Culuumta Badda iyo Qawaaniinta ku saabsan Badaha, ha ahaadano kuwa gudaha ama kuwa Caalamiga ah. Magaca la siiyey AKADEEMIYADDA wuxuu ahaa: <u>AKADEMIYAD CULUUMTA BADDA IYO QAWAANIINTEED EE KHALIF MACOW XASAN,</u> waana Heer Jaamacadeed.

Khalif Mocow wuxuu ahaa macallin Dugsigii Badda iyo Madaxii Maamulka Dekedda Xamar kontomaadkii Qarnigii 20aad. Dabadeed wuxuu u wareegay C.Badda ee X.D.S. 1964tii asagoo ahaa Dhamme, Dabadeed wuxuu gaaray darajada G/Sare iyo Xilka Abbaanduulaha C.Badda Todobaatamaadkii. Khalif wuxuu kulansaday Macallinnimo Cilmiga Badda, Maamulid Howlo Badeed (Deked) iyo Difaacidda Danaha Ummadda ee Badeed waa Ciidanka Badda Soomaaliyeed. Sidaas awgeed ayaa loogu doortay in lagu magacaabo AKADEMIYADDAAN Culuumta Badda iyo

Qawaaniinteeda. Khalif Mocow wuxuu ku dhashay, ku koray, wax ku bartay, kana soo jeeda asal ahaan Magaaladaan Xamar.

Akademiyadda waxaa lagu bilaabay 2015kii 2 (laba) Kulliyadood oo kala ahayd:

1. Kulliyadda Culuumta Badda (Bii'ad iyo Kheyraad)
2. Kulliyadda Culuumta Qaanuunka Badda (Gudaha & Caalamka)

   Dabadeedna waxaa soo biiray
3. Kulliyadda Badmaridda & Makaanikada.

ALLE Mahadii, Sanadkaan waxaa laga qalinjebiyey labadii Kulliyadood ee lagu billaabay AKADEMIYADDA.

I. Kulliyadda Culuumta Badda waxaa ka qalinjebiyey:-

1. C/fitaax Adam Mohamed
2. C/fitaax Faarax Ciise
3. C/rashiid Xasan Cabdi
4. C/raxmaan C/laahi Geedi
5. Cali Max'ed Muuse
6. Asad Cusmaan Afrax
7. Xasan Abuukar Nuur
8. Xuseen Max'ed Cusmaan
9. Ibraahim Max'ed Cumar
10. Cimran Max'ed Faarax
11. Ciise Axmed Guure

12. Max'ed Cabdi Yuusuf
13. Muxudiin Xuseen Muumin
14. Cumar Muxudiin Cumar
15. Yaxye Xuseen Max'ed

II. Kulliyadda Qaanuunka Badda waxaa ka qalinjebiyey:-

1. C/fitaax Mohamed Daahir
2. C/rashiid Nuur Max'ed
3. C/risaaq Max'ed Cabdi
4. C/wali C/laahi Cumar
5. C/qaadir Siidi Cabdi
6. Axmed Cabdi Raage
7. Cali C/qadir Axmed
8. Aways Cumar Abukar
9. Xasan Yuusuf Max'ed
10. Liban Yuusuf Max'ed
11. Max'ed Cumar Xasan
12. Muumin Xasan Yuusuf
13. Colad Axmed Max'ed
14. Cumar C/qadir Cusman
15. Zakariye Cabdi Max'ed

Annagana Maamul iyo Macallimiin waxaa leenahay ***Hambalyo iyo Guul***

<u>Waxaad barateen ugu shaqeeya Dalkiina</u>

# DHACDOOYINKA BADDA

# EE 2020

# Khasaaraha Duufaantii GATI Ee Ku Dhufatay XEEBAHA  Puntland

Saameynta duufaantii GATI ee ku dhufatay xeebaha Soomaaliya dabayaaqadii bishii November ayaa ka jirta wali qeybo ka mid dowlad Goboleedka Puntland.

Hay'adda UNOCHA ee Qaramada ee Qaramada Midoobay waxa ay sheegtay in qiimeynta la sameeyay ay muujineyso in dad ka badan 120,000 oo qof ay saameysay duufaanta gaar ahaan magaalooyinka Boosaaso, Xaafuun, isku shuban, Hurdiya iyo Gumbax.

42,000 ayaa guryahooda si ku meel gaar ah uga barakacay kadib markii ay biyo galeen halka kuwa kale duufaantu saqafka ka qaaday.

50% dadka barakacay waxay u baahan yihiin gargaar deg deg ah oo isugu jira hoy, cunto iyo daryeel caafimaad.

Maamulka Puntland iyo hay'addaha samafalka ayaa wada dadaal lagu taageerayo dadka duufaanta waxyeelada ugu badan gaarsiisay.

26 fasal oo arday wax ku baraneysay iskuulada ku yaala deegannada ayaa duufaanta burburisay waxaana ay arrintan saameysay ilaa 700 oo arday.

**XIGASHO:**

https://www.radiodalsan.com/akhriso-khasaaraha-duufaantii-gati-ee-ku-dhufatay-puntland/

## **Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa dalbatay in meesha laga saaro guddiga wargelinta iyo xiriirinta hawlaha la xiriira ee xeebaha Soomaaliya**

Dowladda Soomaaliya ayaa sheegtay in wixii hadda ka dambeeya ay doonayso in meesha laga saaro guddiga xiriirka ka hortagga burcad badeedda xeebaha Soomaaliya.

Guddigan oo la asaasay in kabadan toban sano kahor, ujeedkiisuna uu ahaa guddi wargelin iyo xiriirnta hawlaha la xiriira ee xeebaha Soomaaliya, waxaana sanadkii 2008 qaraar ay soo saareen Gollaha Amniga ee Qaramada Midoobay lagu hirgeliyay guddigan, maadaamaa xilligaas ay xeebaha Soomaaliya aad ugu badnaayen falalka burcad badeednimada.

Dowladda federaalka ee Soomaaliya ayaa dalbatay in meesha laga saaro guddigan, waxayna sheegeen in sababta aanan loogu baahneyn ay tahay maadaama Soomaaliya aanay saddexdi sano ee lasoo dhaafay xeebaha lagu arkin falal burcad badeednimo.

Guddigan ayaa heli jiray dhaqaale badan oo loo adeegsan jiray kahortagga iyo yareynta falalka burcad badeednimada, haseyeeshee dowladda ayaa ku adkeysaneysa in xilligan aanan loo bahneyn.

“Dhaqaalaha guddigaas waxaa loo adeegsan jiray xabsiyo iyo maxkamado, dadka burcad badeedka lagu soo qabtay sida la sheegayo lagu saaro balse nasiib darro xabsiyadaas waxaa laga dhisay dalalka Tanzania, Kenya iyo Seychelles, marka waxaan leenahay baahida arrintaas ma jirto oo dowladda Soomaaliyeed waxay leedahay awood ay ku maxkamadeyso dadka dembiyada ka gala oo maxkamad lasoo saaro”, ayuu yiri Danjire Abuukar Baalle oo ah danjiraha Soomaaliya ee Qaramada midoobay.

Inkastoo guddigaas la siiyay muddo sanad ah ayaa haddana dowladda Soomaaliya waxay sheegtay inay hor istaagtay lacagahihii la siin jiray guddigaas, waxaana Abuukar Baale uu sheegay in haatan ay adkaan doonta in guddigaas ay shaqeeyaan dhaqaale la’aan.

Gollaha Ammaankan ee Qaramada Midoobay ayuu sheegay in uu aqbalay in dib uu eegis ku sameeyo hawlaha ay qabtaan guddigaas, sanad kadibna la isla eegi doona, haseyeeshee guddiga xiriirka ka hortagga burcad badeedda xeebaha Soomaaliya ayuu sheegay inay ku hawlan yihiin sidii loo sii wadi lahaa hawshaas.

Danjire Abuukar Baale ayaa sidoo kale sheegay in dhaqaalahaas ay tahay in lagu dhiso ciidanka badda Soomaaliyeed, kuwaas oo xeebaha dalka ka ilaaliya burcad badeeda, maraakiibta qashinka ku shubo iyo kuwa sida sharci darrida uga kaluumeysta.

**Xigasho:**

https://www.jowhar.com/news/dowlada-soomaaliya-oo-dooneysa-in-ilaalinta-xeebaha-soomaaliya-lagu-wareejiyo-ciidamada-badda-soomaaliya.html

https://www.bbc.com/somali/war-55205053

## KHASAARIHII KA DHASHAY DABEYLIHII KA DHACAY QAAR KA MID AH XEEBAHA SOOMAALIYA

Sida aanu la socono xeebaha dalkeenna waxaa kusoo kordhayey dabeylaha aadka u xoog badan oo sababa shilal halis ku ah Kalluumeysatada Soomaaliyeed oo ay noloshooda ku xiran tahay wax soo saarka Kheyraadka badeenna. Dabeylahan qaarkood waxay ka dhacaan gudaha Badweynta iyadoo xeebaha markoodi hore ay kasoo shiraacdeen wax dabeyla ahi aysan ka jirin.

Xilliyada qaarkoodna dabeylahan waxay ay halis dhimasho iyo hanti gaarsiisaa maraakiibta gacansiga ee ku kala gooshta badaha aduunka.

Hadaba, bilihii aan soo dhaafnay xeebaha Soomaaliya waxaa ka dhacaayay dabeylo aad u xooggan, weliba ayadoo lagu gudda jiro xilliga bad furanka ah oo la rabay in badda aysan wax dabeylo ah lahayn. Kalluumeysatadana ay isku diyaariyaan xilli wax soo saar lagana faa'ideysto kheyraadka.

Dabeylahaan xoogooda ayaa waxa ay ka dhaceen xeebaha Bari, gaar ahaan, Xaafuun, Guardafue iyo Boosaaso, waxa ayna burburiyeen doomo u badan laashash oo badankoodu ka kalluumeysanaayay xeebaha aan soo xusnay, sidoo kale dabeylahan ayaa soo gaaray xeebaha G.Banaadir iyo Shabeellooyinka sida: Xeebta Liido Xamar weyne, Jasiira, Warshiikh iyo Cadalle waxaana laga dareemay biyaha xeebta ka

naqdo awoodoodo ay aad u xoog badnaayeen isla markaasna qaar ka mid ah doomanka ku xirnaa marsadahaas ay soo gooyeen baroosimankii celinaayay, waxayna sababeen in wax yeello ka soo gaarto dooman badan oo ku xirnaa marsada.

Ayadoo ay badan yihiin dhibaatooyinkaas ayaa cilmibaaris ay sameysay waaxda kheyraadka ee HCBS waxa ay ku soo ogaatay wax yeelaha dabeylahaas ay geesteen oo hore loo shaaciyay loogana digay kalluumeysatada inay ka feejignaadaan.

**Khasaaraha ka dhacay Gobolada:**

1. **Gobolka Banaadir**

Waxaa ku dhintay hal qof oo kalluumeysato ah waxaa burburtay 3 (sedex) doomood, waxaa la waayay 2 (laba) doomood.

2. **Jasiira:** waxaa ku burburtay 1 doon
3. **Warshiikh** waxaa burburay 1 doon
4. **Bari:** 8 doon oo laash ah waa burbureen 1 doon wala wayay,
   3 kalluumeysato ahna waku geeriyoodeen.

Dabeylahaan ayaa ah kuwa aan la saadalin karin xiliga ay ka dhacaayaan badda gudaheeda balse ka hey'add ahaan waxaan soo jeedineynaa inay kalluumeysatada taxadar badan muujiyaan una kalluumeystaan koox koox si ay iskugu gurmadaan haddii ay dhacaan dabeylahaan oo kale.

**W/Q: INJ. CABAAS NUUR MAHDI**
**Ag. Waaxda Kheyraadka Badda**